# Golaha Wakiillada

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

***Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 3aad fadhigii 4aad***

***Wakhtiga uu Furmay: -*** 09:39 AM
***Taariikhda: - Sabti 21 May 2022***

**Guddoonka: -** Mudane C/risaaq Axmed Khaliif

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga: -**

- **Doodda Qiimaynta Xaaladda Dalka**

Md. Mubaarak Muuse Ismaaciil (08Min, 28 Sec) Arrimaha ku saabsan xaaladda guud ee dalka waxa ay u qaybsamaan dhowr qodob. Sida aynu wada ognahay, dalka waxa muddo dheer ka jiray xaalad abaareed oo ay wehelinayaan aafooyin kala duwan, kuwaas oo si gaar ah u saameeyay gobollo iyo degmooyin ka mid ah dalka, gaar ahaan gobollada bari. Abaartu weli way taagan tahay, waxaana jira deegaanno aan helin gargaar ku filan, sida biyo iyo raashin, kuwaas oo ay dawladdu gaadhsiin kari wayday.

Inkasta oo hay'adaha qaabilsan aafooyinka iyo kaydka raashinku ay ka hadleen xaaladda abaaraha, haddana weli ma hayno qorshe qaran oo guud oo wax looga qabanayo meelaha sida ba'an u saameeyay. Sidaa darteed, waxaan Golaha ku baraarujinayaa in aan hawsha si dhab ah u guda galno, isla markaana aan hay'adaha khuseeya dib ugu yeedhno si aynu uga waraysanno xaaladda guud ee dalka iyo qorshaha ay maanta u hayaan.

Qodobka labaad ee aan doonayo inaan ka hadlo waa arrin aad u muhiim ah, taas oo ah xaaladda siyaasadeed ee dalka. Golahayagu waa gole xeer-dejineed, hase yeeshee waxa muuqata in hawlihii xeer-dejinta, gaar ahaan xeerarka la xidhiidha doorashooyinka, aan weli si buuxda loo gudan, isla markaana ay xeerarkaas badankoodu weli qabyo yihiin.

Maanta waxa jira xurguf siyaasadeed oo u dhaxaysa xukuumadda iyo xisbiyada, waxaana jirta cabsi ah in haddii Goluhu kaalintiisa qaadan waayo, dalku u gudbi karo qalalaase iyo rabshado siyaasadeed. Waxaa soo noqnoqday hadallo ay warbaahinta ka sii daayeen masuuliyiin ka tirsan xukuumadda iyo xisbiyada, kuwaas oo ku hanjabaya in haddii doorashooyin aanay qabsooMin 13-ka November, dalku gali karo xaalad khatar ah. Arrintaasi waa mid dhaawacaysa sumcadda Somaliland, maadaama ay muddo 30 sano ah dunidu inoogu aqoonsanayd dal ku suntan dimuqraadiyad iyo doorashooyin.

Golaha waxa waajib ku ah in uu ka qayb qaato dejinta iyo dhamaystirka xeerarka doorashooyinka, isla markaana aanu noqon gole iska fadhiya oo sugaya inta ay dhibaato dhacdo. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in Goluhu midnimo ku wajaho arrimaha sharciga ah ee ay xisbiyada iyo xukuumaddu isku hayaan, isla markaana uu doorkiisa ka qaato dhexdhexaadinta iyo talo-bixinta ku salaysan sharciga, si loo waafajiyo arrimaha doorashooyinka, furista ururrada siyaasadeed, iyo hannaanka doorashooyinka mustaqbalka.

Waxaan sidoo kale ku baaqayaa in xeerarka qabyada ah, sida xeerarka doorashooyinka iyo xeerarka kale ee muhiimka ah, Goluhu si degdeg ah uga shaqeeyo, si uu u noqdo gole si dhab ah u metela shacabka, una shaqeeya dimuqraadiyadda iyo xasilloonida siyaasadeed ee dalka.

Ugu dambayn, waxaan la qabaa mudanayaashii iga horreeyay ee ka hadlay xaaladda abaarta, sicir-bararka, nabadgelyada, iyo arrimaha siyaasadda, maadaama dhammaan qodobadaasi yihiin kuwo isku xidhan oo u baahan xal qaran.

**Md. Cabdiqani Maxamed Aaden** (08 MIN, 28 Sec) Maadaama aynu nahay Golaha Qaranka ee xeer-dejinta, khilaafka ka dhex aloosan xisbiyada siyaasadda, oo ah mid ka mid ah khilaafaadka ugu culus ee hadda jira, waxa laynaga rabaa in aan door muuqda ka qaadanno dejinta xaaladda. Hore, madaxweynayaashii dalka u soo maray waxay isugu yeedhi jireen saddexda xisbi qaran si loo xalliyo khilaafaadka taagan, sidaa awgeed madaxweynaha xilka haya waxa laga rabaa in uu xisbiyada isugu yeedho, si ay khilaafkooda u xalliyaan.

Marka xaaladda guud la eego, odayaashii iyo culimadii dhexdhexaadinta ku suntanaa, sida Sheekh Ibraahim Madar, Sheekh Muuse Goodaad, iyo Sheekh Cabdi-Waraabe, way geeriyoodeen, aqoonyahannadiina doorkoodii hore si buuxda uma qaataan. Sidaa darteed, Golahan ayaa laga sugayaa inuu kaalin mug leh ka qaato dejinta xaaladda.

Waxa isa soo taraya hadallo iyo ficillo bulshada kala fogaynaya, gaar ahaan dhalinyarada, taas oo halis ku ah nabadgelyada. Sidaa awgeed, waxa loo baahan yahay gurmad degdeg ah iyo in Goluhu baaq qaran soo saaro, si looga hortago in xaaladdu faraha ka baxdo.

**Md. Siciid Jaamac Cali** (08 MIN, 28 Sec) Waxaan ku jirnaa xaalad adag oo is daba joog ah; abaartii weli way taagan tahay, roobabkuna si guud uma wada da'in, marka laga reebo meelo kooban. Arrintaasi waxa ku darsamay masiibadii suuqa gubtay, inkasta oo si wanaagsan loogu gurmaday, haddana waxa weli taagan mushkilad kale oo qaran, taas oo ah sicir-bararka ba'an ee maalinba maalinta ka dambaysa sii kordhaya.

Sidoo kale, arrinta amniga ayaa ah tan ugu halista badan, maadaama amni la'aantu burburin karto dawladnimada iyo nidaamka. Somaliland waxa ay ku suntanayd nabadgelyo, hase yeeshee maanta waxa muuqata in xaaladdu ka sii darayso.

Khilaafka ka dhex jira xisbiyada, xaaladda guddida doorashooyinka, iyo ficillada kicinaya dhalinyarada, dhammaantood waa arrimo khatar ku ah nabadgelyada. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in la sameeyo guddi degdeg ah oo isku dhafan, kana shaqeeya dejinta xaaladda, la wacyigeliyo dhalinyarada, lana mideeyo xisbiyada iyo xukuumadda, si looga hortago burbur iyo qalalaase.

**Md. Saleebaan Axmed Carrab** (08 Min, 28 Sec) Shirguddoonka iyo mudanayaasha Golaha waan salaamayaa. Ugu horreyn, waxaan u mahadcelinayaa Guddida Joogtada ah ee warbixinta faahfaahsan inoo soo gudbisay. Sida la wada ogyahay, dalka waxa ka jirta abaar ba'an oo saamaysay gobollo badan, isla markaana ay la socdaan cunto-yari iyo biyo-yari. Xoolihii meelo roob helay gaadhayna aad ayay u itaal-daranyihiin, taas oo sii adkaynaysa xaaladda guud ee nolosha.

Waxaan baaq u dirayaa hay'adaha ku shaqada leh arrimaha abaaraha, gaar ahaan Hay'adda Gurmadka Abaaraha iyo Kaydka Raashinka, anigoo leh waa in ay kormeer ku soo sameeyaan goobaha ay abaaruhu sida ba'an u saameeyeen, si ay warbixin rasmi ah uga diyaariyaan xaaladda abaaraha. Haddii roobku sidan u sii taagnaado, waa in wixii gargaar ah ee la hayo si degdeg ah loo gaadhsiiyo dadka ay dhibaatadu saamaysay, maadaama aan indhahayga ku soo arkay dad ay jirto dhibaato nafsi iyo mid jidheed oo ba'an.

Dhanka kale, sida aynu warbixinaha ku maqalnay, waxa dalka ka jira sicir-barar baahsan oo ay sabab u yihiin colaadaha caalamiga ah iyo isbeddelka cimilada, iyadoo dalalkii waaweynaa ee wax dhoofin jiray ay joojiyeen ama xaddideen badeecadahoodii. Waxaan soo jeedinayaa in xukuumaddu si dhab ah ugu guntato wax ka qabashada sicir-bararka, isla markaana ay dhiirrigelin ballaadhan ku samayso wax-soo-saarka dalka.

Wax-soo-saarka gudaha ayaa ah jidka keliya ee lagu badbaadi karo. Sidaa awgeed, waa in la dhiirrigeliyaa wax-soo-saarka kalluunka, maadaama aynu leenahay bad aad u dheer; sidoo kale dalka waxa ku jira macdano badan oo ku jira berriga iyo baddaba, iyo xoolo nool oo u baahan in si dhaqaale ahaan loo horumariyo. Dhammaan khayraadkaas waxa loo baahan yahay in loo sameeyo qorshayaal qaran oo wax ku ool ah, si looga badbaado aafooyinka kala duwan ee ka dhici kara dalkeena. Dhanka soo saarista shidaalkana, waa in si gaar ah looga warhayo.

Waxaan sidoo kale ka hadlayaa arrimaha nabadgelyada. Nabadgelyadu waa furaha koowaad ee wax kasta; haddii nabadgelyadu xumaato, dhammaan hawlaha kale way istaagayaan. Qarankan waxa uu muddo ku dhow soddon sano ku caan baxay nabadgelyo, sidaa awgeed waa in si adag loo ilaaliyo, meelaha aanay gaadhinna la gaadhsiiyo, meelaha ay ka jirtona lagu sii adkaysto. Wax kasta oo abuuri kara amni-darro waa in laga fogaadaa.

Sida aynu ka warqabno, tabashooyin way jiraan, maadaama aynu nahay dal ay ka jiraan xisbiyo muxaafid iyo mucaaradba leh, qof walbana aragtidiisa ayuu ka eegi karaa talada.

Hase yeeshee, marka ay noqoto nabadgelyada qaranka, waa in dhinac looga soo wada jeesto, shuruucda dalkuna ay noqdaan kuwa aynu wada ilaalinno. Anigoo ku hadlaya magaca Golaha Wakiillada, waxaan soo jeedinayaa in aynaan dhinac u janjeedhin, isla markaana aynu si midnimo ah uga wada shaqayno ilaalinta amniga, annagoo ku dhaqmaya sharciga dalka. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamuud Saalax** (07 Min, 25 Sec) Shirguddoonka iyo mudanayaasha Golaha waan salaamayaa. Salaan ka dib, maanta waxa laga hadlayaa xaaladda guud ee dalku marayo, ha noqoto dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada.

**Dhaqaalaha:** Ugu horreyn, waxaan ka hadlayaa arrimaha dhaqaalaha. Marka la eego sicir-bararkii jiray, abaarihii ina soo maray, iyo gubashadii suuqa Waaheen, waxa la odhan karaa dhaqaale ahaan waxyeellooyin badan ayaa dhacay, inkasta oo dadaallo badan la sameeyay, haddana weli wax badan ayaa u baahan in la qabto.

Gubashadii suuqa Waaheen waxa laga sameeyay dadaallo la mahadiyo, hase yeeshee hawlo badan ayaa weli hadhay. Dhanka sicir-bararka, waxa muuqata inuu weli ku socdo xawaare sare, iyadoo shidaalku ka mid yahay sababaha ugu waaweyn, isla markaana uu saamayn ku yeeshay dhammaan nolosha bulshada, laga bilaabo raashinka ilaa qalabka dhismaha.

Waxaan soo jeedinayaa in Guddida Dhaqaalaha iyo Ilaalinta Hantida Qaranku ay kulan degdeg ah isugu yimaadaan, si ay warbixin faahfaahsan uga diyaariyaan saddexdan arrimood: sicir-bararka, abaaraha, iyo soo kabashada suuqa Waaheen, iyagoo ka duulaya warbixintii hore ee Guddida Joogtada ah. Sidoo kale, waa in si degdeg ah loola kulmaa Guddida Suuqa Waaheen iyo Guddida Abaaraha, si tallaabooyinka xiga loo qaado.

**Doorashooyinka iyo Arrimaha Siyaasadda:** Arrimaha doorashooyinka waa kuwo jira oo u baahan in si dhab ah looga hadlo. Maadaama aynu nahay Golaha Wakiillada, oo ah gole siyaasadeed, waa waajib in aynu door muuqda ka qaadanno siyaasadda qaranka. Waxaan qabaa in mudnaanta koowaad la siiyo dejinta xaaladda, maadaama marka xaaladdu degto ay suurtagal noqonayso in arrimaha kale oo dhan laga wada hadlo.

Waxaan soo jeedinayaa in Golaha laga saaro guddi waayeel ah oo ka shaqeeya dejinta xaaladda, iyagoo kaashanaya cid kasta oo ay u arkaan inay waxtar leedahay, sida Golaha Guurtida iyo aqoonyahannada, si arrimaha loo gaadhsiiyo meel wadahadal lagu xallin karo.

Sidoo kale, dhamaystirka xeerarka doorashooyinka khuseeya iyo guddida ururrada siyaasadeed ee hadda Golaha taalla, waa in aynu si buuxda uga qayb qaadanno. Intaa ka dib, waxa loo baahan yahay in aynu qaabayno sidii ay doorashooyinku ugu qabsoomi lahaayeen si nabadgelyo ah, annagoo tixgelinayna shuruucda, dhaqanka, duruufaha dalka ka jira, iyo baahida loo qabo midnimo qaran. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamuud Faarax Jaamac (05 Min, 36 Sec)** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Waxaan salaamayaa Guddoomiyaha, dhammaan Xildhibaanada sharafta leh iyo shaqaalaha Golaha. Xaaladda uu dalku marayo waa mid cabsi badan. Marka aan ka bilaabo abaaraha, waxaan Ilaahay ka baryayaa inuu inaga soo qaboojiyo abaarta.

Xaaladda suuqa gubtay ee Waaheen waa mid gacanta lagu hayo, balse waxa loo baahan yahay in si hufan loo maamulo. Arrinta kale ee weli taagan waa doorashooyinka, gaar ahaan doorashada Madaxtooyada. Waxa aynu arkaynaa baaqyo ka imanaya xisbiyada mucaaradka ah, iyagoo dalbanaya in doorashada la qabto, halka ay xukuumaddu u muuqato mid kala fogayn iyo kicin ku jirta, guddidii doorashooyinkana ay dhex taagan yihiin faragelin iyo muran, taasina xal ma noqonayso.

Haddii doorashada la qaban waayo, xaaladda dalka way is beddeli doontaa, xildhibaannaduna sii ahaan mayno. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in xildhibaannadu ay is-xilqaamaan, caadifadana iska daayaan, si ay xukuumadda ugu cadaadiyaan in doorashada lagu qabto xilligeedii. Somaliland waa dal aynu wada leenahay, qof walbana markiisa ayuu xilka hayaa.

Waxaan ku baaqayaa in aynu Madaxweynaha u tagno, annagoo ku leh: dadku doorasho ayay u diyaar yihiin, dhaqaaluhuna waa jiraa, maxaa ina haysta? Waayeelku waa inaga, masuuliyadda dalkuna waa inaga. Haddaynu ku fashilanno, cawaaqibkeeda qof walba wuu dhadhaMin doonaa. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Nuur Cismaan Guuleed (04 Min, 15Sec)** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shirguddoonka, xildhibaanada, shaqaalaha iyo saxaafadda waan salaamayaa. Marka la yidhaahdo xaaladda dalka, waa arrin ballaadhan, hase yeeshee anigu dhawr qodob ayaan diiradda saarayaa.

**Amniga:** Amnigu waa saldhigga nolosha, dawladnimada iyo jiritaanka Baarlamaanka. Sidaa awgeed, cidna dan uma aha in ay khalkhaliso amniga. Amnigu ma aha arrin gorgortan geli karta, waana in aynu mudnaanta koowaad siinnaa, annagoo ah Baarlamaanka dalka.

**Siyaasadda:** Siyaasaddu xeer la'aan ma socoto, xeerarkana inaga ayaa samayna. Sidaa awgeed, waa in aynu ku dhaqannaa xeerarka jira, wixii ka dhimana si degdeg ah u samaynaa, si arrimuhu inoogu hagaagaan.

**Abaaraha:** Abaaraha waxa loo saaray guddi, hase yeeshee weli cabashooyin baa jira. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in guddidaas dib u qiimayn lagu sameeyo, lana ogaado halka ay hawshu marayso.

**Sicir-bararka:** Sicir-bararka, gaar ahaan shidaalka, waa dhibaato caalami ah oo dunida oo dhan saamaysay. Sidaa awgeed, in kasta oo qiimuhu kordhay, waa in la hubiyaa in waxyaabaha daruuriga ah la helo, si bulshada u adkaysato xaaladda.

Ugu dambayn, waxaan leeyahay xaaladda dalka waa mid aynu wada ognahay, waxaana waajib inagu ah in aynu si xikmad leh u maarayno, annagoo rajaynayna khayr iyo horumar. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamed Xuseen Jaamac (Raambo)** **(04Min, 01Sec)** Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waan idin salaamayaa, waxaanan inoo rajaynayaa khayr fara badan.

Dalka waxa ka jira xaalado kala duwan, waxaana ka bilaabayaa xaaladda abaaraha. Roobkii aynu sugaynaynay aad buu u yaraa, taasina waxay keentay saamayn nololeed, dhaqaale iyo mid bulsheed. Waxa loo baahan yahay in laga sii diyaar garoobo, lana yeesho qorshe fog oo wax ku ool ah. Golena ahaan, door muhiim ah ayaynu ka qaadan karnaa, waana waajib inaga saaran.

Arrintii dabka Suuqa Waaheen waxay saamayn dhaqaale oo weyn ku yeelatay dalka, soo kabashadiisuna waxay qaadan doontaa muddo dheer. Qaybtii ganacsiga iyo socodkii maaliyadda dalka dhaawac culus baa gaadhay. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, dawlad iyo shacabba way u gurmadeen. Annaga Gole ahaan waxa inagu waajib ah in aynu dejinno xeerar kor u qaadaya badqabka dhismayaasha shacabka, maadaama ay jirto gaabis sharci oo horseedi kara in magaalooyinku u nuglaadaan masiibooyin ka dhasha ficillada aadanaha.

Caasimadda Hargeysa iyo magaalooyinka kale ee dalka si weyn ayay u fidayaan, ha noqoto baaxad ahaan iyo dad ahaanba. Sidaa darteed, waa in aynu samayno xeerarka loo baahan yahay, oo uu ka mid yahay Xeerka Badqabka Dhismayaasha. Dhismayaashu aad bay ugu nugul yihiin dabka, maadaama aanay jirin hannaan sharci oo mideysan oo lagu dhiso.

Waxa ay ahayd, kana habboonayd, in markii masiibada dabku dhacday aynu ka soo noqono fasaxyadeennii, maadaama dabku baabi'iyay dhaqaalaheennii. Taasi way dhici wayday. Haddii ay dhici waydayna, waa in aynu mudnaanta koowaad siinnaa suuqa iyo badqabka dabka ee magaalooyinkeena. Warbixino caalami ah oo baahay ayaa Golahan ku canaantay inuusan qaban xataa kulan degdeg ah oo arrintaas wax iskaga waydiiyo. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in aynu u yeedhno guddiyada kala duwan ee loo saaray dhaqaale-ururinta suuqa Waaheen ee gubtay, si aynu wax uga waydiinno, warbixinna inoo soo gudbiyaan.

Dhanka arrimaha dibadda, xukuumadda Somaliland dadaallo badan ayay ka samaysay siyaasadda arrimaha dibadda, kuwaas oo horseeday guulo muuqda. Arrimaha dibaddu waa halgan ina mideeya, qof walbana waxa looga baahan yahay inuu kaalintiisa ka qaato.

Mudanayaal iyo Mudane Guddoomiye, Hargeysa iyo inta badan dalka ma helaan biyo ku filan. Juquraafi ahaan waxa aynu ku noolnahay dhul roobku iyo biyuhuba ku yar yihiin. Biyuhu waa nolosha, waana furaha horumarka. In caasimaddu biyo la'aan ku sii jirto lama aqbali karo. Waxaan qabaa in Goluhu xil gaar ah iska saaro guud ahaan biyaha dalka, gaar ahaan Caasimadda Hargeysa.

Arrinta siyaasadda, waa in si miyir-qab ah looga wada hadlaa. Haddii Madaxweynuhu tago khayriyadaha ama bartamaha suuqa, waa booqasho uu dalkiisa ku tagay, wax ceeb ahna kuma jirto. Hase yeeshee, waxaan soo jeedinayaa in faraha la isula taago si miyir leh. Waa xaq iyo sharci in doorasho dhacdo, gaar ahaan doorashada Madaxtooyada, balse taasi kuma iman karto xad-gudub iyo wax u dhimaya nabadgelyada.

Nabadgelyada dalku qof walba waa u dan, cid aanay dan u ahayni ma jirto. Annaga oo Gole ah xil gaar ah ayaa inaga saaran. Haddii aynu dhinacyo kala safanno, ma noqon karno odayaal dhexdhexaad ah sida Sheekh Ibraahim, Suldaan Maxamed, Sheekh Muuse Goodaad iyo Xaaji Cabdikariim. Haddii aynu doonayno in xisbiyada la isu soo dhoweeyo, waa in aynu si toos ah ugu dhex galnaa xaaladda siyaasadeed ee murugsan.

Waxaan ku soo gunaanadayaa in mar walba si miyir-qab ah looga wada hadlo arrimaha siyaasadda. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Xasan Saleebaan Dhuxul (Laab-saalax)** (12Min, 17Sec) Ilaahay baa kaligii mahad leh. Mudanayaasha Golaha Wakiillada ee halkan xaadirka ku ah, gaar ahaan Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Md. Cali Xaamud Jibriil, dhammaantiin waan salaamayaa.

Waxaa laga hadlayaa xaaladda dalka, xaaladda dalkuna aad bay u fara badan tahay. Waxaan ugu horreyn ka hadlayaa sicir-bararka.

Sicir-bararka, Mudanayaal, waagii hore ee ilbaxnimadu aanay ina soo gaadhin, dadkeennu waxay ahaayeen reer-guuraa xoolo-dhaqato ah oo leh dhaqan iyo hiddo u suurto-galiyay inay la tacaalaan duruufaha nololeed. Waxay ahaayeen dad isku-tashaday, ka maarmay gacan shisheeye, ceebna u arkay in gacanta la hoorsado, kuna noolaa karaamo iyo wax-soo-saar gacantooda ku jira. Boqol sano ka hor cidna uma baahnayn wax dibadda uga iman jiray.

Maanta se, wax kasta oo la isticmaalo dibadda ayaa laga keenaa. Dagaallada dunida ka socda, sida dagaalka Ruushka iyo Ukraine, iyo aafooyin kale sida Covid-19, waxay keeneen carqalado dhaqaale oo caalami ah. Taasi waxay ina tusaysaa in aanay suurtagal ahayn in aynu sii ahaanno bulsho gebi ahaanba ku tiirsan wax dibadda ka yimaadda. Sidaa awgeed, xeerarka xoojinaya wax-soo-saarka gudaha waa lama huraan.

Dhanka baraha bulshada, gaar ahaan TikTok, dunidu way isku furantay, taas oo keentay khayr iyo sharba. Waxa soo galay dhaqammo aan diin ahaan iyo dhaqan ahaanba habboonayn. Iyadoo la qirsan yahay doorka ay shirkadaha tiknoolajiyadu ka qaateen isku xidhka dunida, haddana waxaan soo jeedinayaa in aaladaha qaarkood, gaar ahaan TikTok, si gaar ah loo xakameeyo ama loo xanibo, isla markaana Goluhu dejiyo xeerar lagu maamulo baraha bulshada.

Arrinta doorashooyinka, Mudanayaal, Golahan 82-da xildhibaan ah ayaa metela umadda. Kala qaybsanaan bulsho ma jirto, balse waxa jira kala qaybsanaan siyaasadeed oo salka ku

haysa xeerar la'aan. Tusaale ahaan, Komishanka Doorashooyinka Qaranka xeer cad oo ay isku maamulaan ma laha. Taasi waa mas'uuliyad inaga saaran in aynu saxno.

Baahida koowaad ee dalku ma aha doorasho, waa amni. Haddii amni la waayo, wax walba way burburayaan. Sidaa awgeed, waxaan taageerayaa soo jeedinta ah in Goluhu saaro guddi isku-dhafan oo arrimahaas ka shaqeeya.

Intaas marka laga yimaaddo, Golahani ma ka hadli karaa xaaladda dalka iyadoo aan laga hadlin xaaladdiisa gudihiisa? Anigu waxaan qabaa maya. Goluhu dib-u-habayn ayuu u baahan yahay, xeerar badan oo wax-ka-beddel iyo kaabis u baahan ayaana jira, sida Xeerka Dhulka, Xeerka Saxaafadda, iyo Xeerka Ciidanka Booliska.

Dastuurka, gaar ahaan Qodobka 45aad iyo 46aad, si cad ayuu u qeexayaa muddada fasaxyada Golaha. Saddex bilood oo fasax ah oo la galay iyadoo aan arrintaas si sharci ah loo meel marin waa dastuuri-jab. Arrimahaas oo aan laga hadlin, dooddan in la furo anigu ma qabo.

Ugu dambayn, Mudanayaal, Somaliland 30 sano ayay jirtay. Haddii Goluhu saxmo, dalkuna wuu saxmayaa. Haddii Goluhu qallooco, dalkuna wuu qalloocayaa. Sidaa awgeed, waxa aynu u baahanahay qorshe qaran oo ilaaliya midnimada, wada-jirka iyo mustaqbalka umaddeenna. Intaas ayaan ku soo gunaanadayaa.

**Md. Axmed Muuse Jaamac** (12Min, 16Sec) Waad mahadsan tahay Mudane Guddoomiye. Ilaahay baa mahad leh. Shir-guddoonka iyo Mudanayaashana waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka (ASC).

Bacda salaam, xaaladda guud ee dalku aad bay u ballaadhan tahay, waxaana ka mid ah abaaro muddo dheer dalka ka jiray oo weli sii jira, sicir-barar aad u daran oo bulshadu la daala-dhacday, muran siyaasadeed, iyo arrimaha nabadgelyada.

Mudanayaashii iga horreeyay ayaan la qabaa dhammaantood; waxay taabteen abaaraha, sicir-bararka, nabadgelyada iyo siyaasadda. Sida aynu wada ognahay, abaar baa dalka ka jirta welina way sii taagan tahay. Iyadoo abaartaasi jirto ayay ku xigtay aafo labaad oo ah sicir-barar, ka dibna waxa raacay masiibadii suuqa Waaheen oo lagu qiyaasay in ay ku gubatay ku dhowaad 40% dhaqaalaha dalka. Saddexdaas aafo weli kama aynaan bixin, hase yeeshee waxa haddana bilaabmay muran siyaasadeed.

Dadkii ay saameeyeen labada abaarood ee waaweyn uma baahna culays siyaasadeed; waxa u hadhsanaa oo keliya nabadgelyadii. In nabadgelyada lagu daro khalkhal siyaasadeed waa aafo kale oo dheeraad ah.

Muranka siyaasadeed cid kasta oo wada, waa waajib in aynu farta ku fiiqno. Dastuurku Golahan waxa uu siiyay awoodo ballaadhan, kuwaas oo ay ka mid yihiin metelaadda shacabka Somaliland, la-xisaabtanka xukuumadda, iyo u gudbinta talooyin iyo tallaabooyin ku saabsan hoggaaMinta dalka. Haddii aynaan awoodahaas isticmaalin, waxa aynu noqonaynaa daawadayaal oo keliya.

Arrinta suuqa Waaheen, waxaan soo jeedinayaa in Goluhu kaalin muuqata ka qaato. Ciidamada mushaharkooda waa loo jaray, iskuullo iyo ardayna way ka qayb qaateen, balse meel uu Goluhu kaga jiray ma jirto. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in Goluhu ugu yaraan laba ama saddex bilood mushaharkiisa kaga qayb qaato gurmadka masiibadii suuqa Waaheen, maadaama ay ku gubatay hanti shacab iyo mid qaranba ah.

Arrinta abaarta, Illaahay ayaynu ka baryaynaa inuu roob inoo shubo. Illaahow roobkii hore ee aad noo shubtay nimco ayuu ahaa, ee noo siyaadi.

Muranka siyaasadeed ee hadda taagan, gaar ahaan kan ku saabsan doorashooyinka, wuxuu galay marxalad qalafsan. Guddi ayaa la baadhay, xeerar badan ayaa la isku haystay, Golaha ayaa marar kala duwan ku kala dareeray, masuul kastana meel kasta oo uu istaago waxa uu ka hadlayaa furista ururrada, doorashada madaxtooyada, ama Xeer Lr. 14. Haddaba, dalka laba xeer 14 kama jiraan; hal xeer oo keliya ayaa jira, kaas oo ah kii 2011. Xeerkaasi ma qeexayo wakhtiga ay doorashada ururradu dhacayso, balse waxa uu tilmaamayaa nidaamka oggolaanshaha iyo muddada ay ururradu shaqaynayaan.

Xeerarku waa in ay noqdaan kuwo cad oo lagu kala baxo, laguna kala saaro masuuliyiinta iyo siyaasiyiinta. Golahan waxa loo doortay in uu xukuumadda la xisaabtamo, shuruuc cadna u dejiyo bulshada. Ma habboona in Goluhu soo saaro xeerar muran dhalinaya ama bulshada kala qaybinaya. Waa in aynu ilaalinno diinta, dhaqanka iyo xuquuqda dadkii ina soo doortay.

Aqalkan weyn ee aynu ku fadhino waxa loo dhisay meeqaamka iyo masuuliyadda aynu hayno. Rag badan oo hore ayay Ilaahay u naxariistee ummadda iyo nabadda u soo shaqeeyeen; maanta booskaas annagaa joogna, waxaana nalaga doonayaa in aynu halkii la inoo keenay ka sii sarrey gaadhsiinno, dalkana hore u wadno, ee aan dib ugu celin.

Haddaba, cid kasta oo muranka wada, ha noqoto xukuumad ama xisbi, waa in aynu farta ku fiiqno. Waxaan ku soo gunaanadayaa adkayn: in Goluhu ka qayb qaato gurmadka suuqa Waaheen, in la saaro guddiyo sidii hore loo soo jeediyay, iyo in aynu si dhab ah u gudanno doorkeena iyo waajibaadkeena. Aad baad u mahadsan tihiin. WSC.

**Md. Axmed Yuusuf Nuur (Guruuje)** **(11Min, 27Sec)** Bismillaahi. Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha iyo Mudanayaasha sharafta leh waan salaamayaa. Salaan ka dib, hadal badan maanta ma jeedinayo, waxaan ka hadlayaa saddex qodob oo kooban.

Qodobka koowaad: Maalintii dhowayd markii aynu ka hadlaynay xaaladda dalka, Sh. Axmed Dayib wuxuu inoogu bilaabay suuratul Quraysh, oo Ilaahay (SWT) ku yidhi: *"Ilaahay oo idinka quudiyay gaajo, cabsina idinka nabadgaliyay."* Xikmadda aayaddaasi waa in gaajada iyo amniga la isku xidho; qof gaajoonaya ma nabadgalo.

Mudanayaashii iga horreeyay dhammaantood waxay ka hadleen abaaraha, sicir-bararka iyo duruufaha nololeed. Iyadoo xaaladdaasi taagan tahay, haddana Goleheenna iyo

Xukuumadduna talo muuqata kama laha. Dadka inaga wax inaga sugaya waa in aynu xisaabta ku darsanno, ka hor inta aynaan cid kale eedayn.

Waxaa intaas ka daran in miisaaniyaddii inta badan ku baxday casuumado iyo marti-qaad. Haddii kharashaadkaas la ururin lahaa, wax badan bay ka tari lahaayeen xaaladda taagan. 3,400 sano ka hor Nabi Yuusuf (CS) wuxuu ka digay abaaro, wuxuuna ku booriyay in xilliyada barwaaqada wax la kaydsado. Taasi waa xikmad aynu maanta ka faa'iidaysan lahayn.

Dawladda looma samayn in dad mushahar qaata oo keliya la dhiso; waxa loo samaystay in ay bulshada ka caawiso wixii ka culus awoodda qofka. Dal aqoonsi la'aan ahi waa sida ilmo agoon ah oo u baahan daryeel iyo qorshe. Ma lihin saaxiibo waaweyn oo ina daadihiya, sidaas darteed dedaalkeennu waa inuu laba jibbaarmaa.

Ugu dambayn, waxa aynu dunida u bandhignaa dimuqraadiyad iyo doorasho. Dimuqraadiyaddu waxay u baahan tahay jadwal cad (timetable) oo doorasho walba xilligeeda ku dhacdo. Haddii mar kasta marka doorasho la soo dhawaado ay dhacdo qalalaase, waxa dhaawacmaya sumcaddii yarayd ee aynu dunida u haynay.

Waagii lixdamaadkii, sidaan maqlay, Radiyow Itoobiya waxa ka bixi jirtay hees tidhaahda: *"Ilwaad badan iyo adduun ma lahee, iimaankay qabtaa Itoobiya."*

Walaalayaal, maanta iimaan iyo rajo labaduba way inoo yaraadeen. Rajadaas waxaan ku tusaaleeynayaa qisadii asxaabtii dhagaxu ku soo dhacay ee godka galay; markasta oo midkood Ilaahay wax wanaagsan ku baryo, dhagaxii wax yar buu durkaa. Innagana, markasta oo aynu doorasho qabanno, cidhiidhigii wuu inaga durkaa; balse markasta oo doorashadeennu dib u dhacdo oo qaylo gasho, dhagixii wuu inagu sii cidhiidhyaa.

Waxaynu u baahanahay, haddii waxa ugu mudan ee aynu haysannaa uu yahay doorasho, inaynu doorashada ka adkaanno. Waa inaynu ka adkaanno doorashada Golaha Wakiillada, oo aynaan 16 sano fadhiyin; waa inaynu ka adkaanno doorashada golayaasha deegaanka; waa inaynu ka adkaanno doorashada Madaxweynaha. Dunida kama jirto meel sannad kasta, marka doorashada madaxweynuhu timaaddo, marmarsiiyo la raadiyo oo muddo la kordhiyo.

Dunidu laba bay u qaybsan tahay: kuwo dimuqraadiyaddii iska daayay oo hal cid si keli ah u maamusho, iyo kuwo doorashooyin aan muran lahayn ku dhaqma. Tan iyo 1995-kii, mar kasta oo doorashada madaxweyne timaaddo in la kordhiyo xal ma aha. Hadday sidaas noqoto, aynu dastuurka wax ku darno inta uu furan yahay, oo aynu nidhaahno madaxweyne walba toban ama siddeed sano ayuu joogayaa, mar labaadna lama dooranayo; marka muddadiisu dhammaato ha baxo, doorasho ha dhacdo ama yaanay dhicin. Haddii kale, haddii aynu nidhaahno madaxweyne walba shan sano ayuu joogayaa, haddana mar kasta loo kordhiyo, xalkeedu muxuu noqonayaa?

Intaas waxa dheer in dunida oo dhan ay leeyihiin Golaha Amniga Qaranka, La-taliyaha Amniga Qaranka, Siyaasadda Amniga Qaranka, iyo Xeerka Amniga Qaranka. Xeerkaasi waxa uu qeexaa meelaha ugu muhiimsan ee waddan leeyahay: tamarta, caafimaadka, iyo amniga. Marka Madaxtooyadeenna labada dhisme ee iska soo horjeedaa midna hore u ahaa dhakhtarkii weynaa, midna maxkamaddii, isla markaana 30 sano laga cabanayo xaaladda dalka, maxaad ka fahmaysaa?

Haddaba, mar haddii aynu nahay Golaha Wakiillada, laba arrimood aynu ku dedaalno:

1. In aynu subax walba isu nimaadno oo shaqadeenna gudanno.
2. In aynu hal-abuurnimo la nimaadno.

Waxaad mooddaa in hal-abuurnimadii Somaliland ka luntay. Barigii hore ee odayaashu talin jireen wax baa la abuuri jiray. Maanta aynu isku dhiirranno oo aynu abuurno xeerarka iyo siyaasadaha waddanku u baahan yahay.

Haddii musharraxiinta dibadda jooga ay xildhibaanadu dhinacyo kala taageeraan, xildhibaanada Madaxweynaha ay dhinac kale ka yimaaddaan, aniga iyo Sheekh Axmedna halkan isku qabanno, xildhibaanada kalena ina kala taageeraan, maxay Somaliland ka faa'iidaysaa? Waxa aynu isku raacsanahay baa ka badan waxa aynu ku kala aragti duwanahay. Aynu Ilaahay ka yaabno, oo umadda ina sugaysa aynu hagar-baxno. **Way iga dhan tahay. WSC.**

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf** (30 Min, 28Sec) Guddoomiye, aad baad u mahadsan tahay. Hal qodob baan marka hore saxayaa: sida sharcigu sheegay, qofka fadhiga guddooMinaya ayaaba guddoomiye ah.

Marka hore, Shir-guddoonka waan u mahadnaqayaa inay kal-fadhigii 3aad oggolaadeen in lagu daro qiimaynta xaaladda dalka, mudanayaashuna sidaas ay ku ansixiyeen ajandaha kal-fadhiga 3aad. Arrintaasi waa mid muhiim ah, maadaama dalku marayo marxalad xasaasi ah.

Aniga aragtidayda, xaaladda guud ee dalku waxay u badan tahay xil-gudasho la'aan iyo masuuliyad dayac. Dawladnimada iyo kuraasta waaweyn waxa loo yimi in umadda loo adeego, balse waxa muuqata in macnaha xilka laga duway, oo qofku marka uu kursi helo ka tanaasulo wixii umadda uu u ballanqaaday ee ay ku soo doorotay.

Waxaan rabaa in la kala saaro xil qabiil iyo xil qaran. Suldaan reereed xafiis qaran kama shaqayn karo, xilka qarankuse waa mid ka duwan, maadaama aad matalayso dad kala duwan, oo ay codkooda ku doorteen. Waxa ugu yar ee dawladnimo laga rabo waa damiir shaqaynaya, iyo in masuulku ku dhibto hooyada gaajaysan, hooyada bilaa caafimaadka ah, iyo carruurta tabaalaysan.

Run baan idiin sheegayaa: Hargeysa lacag la'aan uma biyo la'a, laba arrimood bay u biyo la'dahay—**qabyaalad iyo karti-darro**. Qabyaaladdu waa waxa innaga hor istaagay

horumar; haddii ay wax dhisi lahayd, 30 sano ka dib Hargeysa biyo iyo caafimaad bay haysan lahayd.

Taariikhda Islaamka, Cumar binu Khaddaab (RC) ayaa tusaale cad u noqday masuuliyad, markii uu habeenkii Baytul-Maalka u furay carruur gaajaysan, isaga oo diiday in cid kale mas'uuliyadda la wadaagto. Taasi waa dawladnimo dhab ah. Maanta, inkasta oo cashuur badan la qaado, haddana qoysaska danyarta ah lama hayo.

Walaalayaal, abaartu weli way taagan tahay; roobku ma di'in, dabaylo iyo kulayl baa dadkii ku dhacay, gurmad biyo ayaa loo baahan yahay. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in Guddida Abaaraha halkan la keeno, isla markaana Goluhu soo saaro **Xeer Abaaraha**, si gurmadku u noqdo mid sharci iyo nidaam ku dhisan. Garyaqaannada iyo la-taliyayaashana waxaan ka codsanayaa inay diyaariyaan qabyo-qoraalka xeerkaas.

Arrinta doorashooyinka, dadku rajo bay qabaan. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland waxaan kula talinayaa inuu noqdo madaxweynihii ugu horreeyay ee doorasho wakhtigeedii qabta, taariikhdana bog cusub ka fura. Doorashadu ma aha arrin qabiil ama koox gaar ah; waa masiirka umadda. Haddii qaranka la jecel yahay, shaqadiisa ha la qabto.

Waxaan ku soo gunaanadayaa: dimuqraadiyadda aynu dunida u bandhignay waa inay noqotaa mid jadwal leh, doorasho walbana xilligeeda ku dhacdo; haddii kale sumcadda aynu lahayn way dhaawacmaysaa.

Muranka komishanka doorashooyinka ka taagan waa arrin aan la aqbali karin, sharci ahaanna aan sax ahayn. Komishanku hore ayuu u doortay guddoomiye, Md. C/rashiid Riyo-raac, waxaana la ogaa inuu ahaa nin xisbiyahan ah; doorashadii madaxtooyada ee dhowaan dhacdayna si siiriyuus ah ayuu uga ololeeyay uguna qayb-qaatay. In xisbiyada kale ay aqbalaan C/rashiid Riyo-raac waxay ahayd sharaf iyo karaamo, waayo tanaasulku haddii uusan dhinac ka iman waa inuu dhinaca kale ka yimaaddaa. C/rashiid guddoomiye ayuu noqday, doorashadii aynu mudanayaasha ku noqonayna isagaa noo qabtay, waana uga mahad-naqaynaa doorashadii fiicnayd ee uu qabtay.

Komishankii Cabdirashiid doortay ayaa isna markii hore doortay Marwo Kaltuun. Taasi waa *gender balance*, maadaama goleheenna aanu haba yaraatee haween ku jirin, komishankana gabadhii keliya ee ku jirtay la doortay. Wax kasta oo kale in lagu liqo ayay ahayd in gabadha la doortay, isla markaana Kaltuun loo daayo xilkeedaas. Aniguna waxaan qabaa in booskaas loo daayo, waayo waa gabadh ka soo bixi karta xilka, lehna karti, sharaf iyo doonis. Mudanayaasha is-casilaya ee komishanka, Mudane Guddoomiye, tallaabadaasi waa sharci-darro. Madaxweynuhu xaq buu u leeyahay wixii uga soo baxa inuu gudi u saaro, guddiduna wixii xaqiiqo ah ee ay soo saarto ayuu Madaxweynuhu markaas ku soo jeedin karaa xil-ka-qaadis; haddii Goluhu ku raacona sidaasay ku waayi doonaan kalsoonidii, haddii lagu diidona sidaasuu komishanku ahaanayaa.

Dugsiyo dumay: halkan waxaan ku hayaa dugsiyo dumay oo carruurtu bannaanka ku fadhiyaan. Dugsiyadaasi dabayl xoog leh ma haleelin, balse roobkii yaraa ayaa ka qaaday

jiingaddii. Iskuulladaas waxaa ka mid ah Baho-Dhamal oo carruurtu bannaanka ku fadhiyaan, Sayla Bari oo carruurtu bannaanka ku fadhiyaan, Xidhinta oo sidaas oo kale ah, iyo Awdal oo qaybo ka mid ah xarunta gobolku ka qaadday jiingaddii. Togdheer, Waabaha meel la yidhaahdo iyo meel la yidhaahdo Biyo-Xidho, labadaba jiingaddii waa ka qaadday, carruurtiina bannaanka ayay fadhiyaan.

Wasaaradda Waxbarashadu masuuliyaddeedii way gudatay, balse dambiilaha ugu weyn waa Wasaaradda Hawlaha Guud oo 5% ku leh mashaariicda dalka. Shantaas boqolkiiba ee ay kormeerka ku samayn lahayd ayaa Hargeysa lagu cunaa. Ninkii iskuulka dhisay ayaa ummadda ka khasaariyay, cid kula xisaabtanta ama kala wareegtana wuu waayay. Gobolka Sanaag, meel la yidhaahdo Bixin-Dhallaax iyo Baladdan, carruurtu bannaanka ayay fadhiyaan. Gobolka Sool, Caynaba iskuul la yidhaahdo Ayaanle waa bilaa jiingad, Ceel-Dhaab waa bilaa jiingad, Oog waa bilaa jiingad, Kulaal waa bilaa jiingad, Dharkayn-Geeyo waa bilaa jiingad, Xudunna waa bilaa jiingad.

Iskuulladaas oo dhan kharash baa laga qaaday qaranka, balse kharashkii jeebab rag buu galay. Sida caadiga ah, haddii aad aragto nin mashruuc qaatay oo laba sano waraaqo la hortaagan xisaabiyaha iyo maaliyadda, waa nin iskuulkii loo diray si fiican u dhisay; haddii aad aragto nin aan dhismaha bilaabin oo foojarradii iyo lacagtii loo qoondeeyay iskuul uu 500 kun ku qaatay, shantaas boqol laba boqol ka mid ah wuu faraqay, laaluushna buu ku bixiyay, hay'adahana dhex mariyay, dabadeedna si degdeg ah ayaa loogu saaray. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in carruurtaas bannaanka ku fadhiya si degdeg ah looga kiciyo loona dhiso iskuulladoodii. Cashuurtii way bixiyeen, waajibkoodiina way guteen; sidaas darteed, iskuullada carruurta waa in loo dhisaa.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaasha sharafta leh, waxaad mooddaa in tartankeennii ku soo ururay nidaam reeraysan, qabyaaladaysan ama xaafadaysan, taas oo aad mooddo in dhaqankii lumayo. Waxyaabo aan hore golayaasha dhexdiisa loogu odhan jirin ayaa maanta la isku odhanayaa. Habeen dhaweyd, Abwaan Xasan Saleebaan Dhuxul oo ah nin weyn oo abwaan ah ayaa ka qayb-galay xafladdii 18-ka May, wixii baraha bulshada ka dhacayna waad wada aragteen. Goorma ayaynu sidaas u kala dhimanay? Xasan baa tagaya, aniga baa tagaya, Maxamed Khadar baa tagaya. Dad walaalo ah baynu nahay; kuraas baa lagu tartamayaa, aniga kursiga kaaga fiican iyo adiga kaayga fiican baa la isku hayaa, balse ma aha qabyaalad, ma aha nacayb iyo xumaan. Marka aynu is-saxayno oo wax isu sheegayno, cadaw iskuma nihin. Maalin dhowayd taliyuhu wuxuu igu yidhi "cadawga Somaliland baad tahay." Anigoo leh wax ha la toosiyo, ha la hagaajiyo, dhakhtarka weyn ee Hargeysa ha shaqeeyo, biyaha Hargeysa ha laga shaqeeyo, iskuullada ay carruurtu cadceedda ku fadhiyaan ha loo hagaajiyo, waxaan dadka reer Somaliland weydiinayaa: ma cadawga Somaliland baan ahay? Idinka ayaa ka jawaabi doona. Anigu raalli kama ihi in xoolihiinna la cuno, mana aqbalo in hal qof maxkamad si cadaalad-darro ah loogu xukumo.

Wasaaradda Maaliyadda iyo ganacsatada: ganacsatada cashuurtii ku waajibtay lagama qaado, balse waxaa laga qaadaa cashuur loo jideeyay oo la yidhaahdo *rasaamaal*, taas oo lagu daro gaadiidka lagu soo qaaday laguna daro cashuurta. Ganacsatadu marka ay Wasaaradda Maaliyaddu cashuur soo rogto ama Goluhu tacriifad cusub sameeyo, waxay ugu jecel yihiin in kastamka lagu cashuuro. Sababtu ma ogtihiin? Haddii $500 lagu yidhaahdo dekedda Berbera ayaa la idin saaray, ganacsatadu sacab bay garaacayaan, waayo iyagu dadkay saarayaan oo adiga ayay kugu saarayaan. Waxa baaqday in laga qaado cashuurtii macaash-macaashka iyo cashuurihii berriga; kuwaas lama qaado.

Wasiirka Maaliyadda oo aan maalin dhowayd halkan ku waraysanaynay waan kala hadalnay, waxaanan ku nidhi cashuurta berriga ka qaada. Waxaan soo jeedinayaa, dadka Somalilandna maqashiinayaa, in magaalo kasta ay 20 km oo seesa ah ku hareeraysan tahay, lacag badanna ku jirto. Lacagtaas waxaa laga qaadaa miskiin cashad ku haysta Xudun ama Ruqi, laguna yidhaahdaa macaash-macaash baa kordhay, balse jagada $500 kun lagu siistay sannadihii 2021 iyo 2022 lama yidhaahdo lacag baa ku kordhay, ilayn ganacsi weeye.

Macaash-macaash waa in laga qaadaa. Wasiirka Maaliyaddana waan u sheegnay in arrintaas xeer ahaan lagu caddeeyo, maadaama nin shaqaale ah oo 30 sano golahan u shaqaynayay aanu awoodin inuu baloodh carruurtiisa ku korsado ama iibsado. Yaa ku qaaliyeeyay? Ganacsatada. Lacagtii suuqa wareegi lahayd ee danyartu ku shaqaysan lahayd jagado ayay ku jirtaa; inta kale ee madaxdu heshayna akoonno dibadda yaal—Dubai, Jabuuti iyo meelo kale—ayay dhigtaan. Lacagtaas waa in la soo saaro lana soo celiyo, dhulkana cashuurta dawladaha hoose ee 20% iyo 50% lagu xidhay laga qaadaa si uu ummadda ugu jabto.

Golaha Wakiillada, waxaan soo jeedinayaa in Goluhu si adag u ilaaliyo dastuurka. Kal-fadhigii dhowaa fasixiisii qodob dastuuri ah ayaannu si toos ah u jabinnay; yaynaan ku noqon. Wax kasta oo la samaynayo ha waafaqsanaadaan dastuurka. Arrin kale oo aan cudur-daarkeedu jirin waa xaadiriska; guno iyo mushahar baa jira. Rag badan ayaa buuxiyay 20-kii fadhi ee dastuurku sheegay in xilka lagu waayo haddii mudanuhu iman waayo. Mudanuhu haddii aanu shaqo iman waa inuu booska u baneeyaa kii ku xigay. Sidee buu u seexan karaa isaga oo dad soo doorteen? Aakhirana waa la waydiinayaa. Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, gunnooyinka ha laga jaro, mushaharkana keliya ha qaato.

U-yeedhista masuuliyiinta: Mudane Guddoomiye, masuuliyiin baa Goluhu iyo guddiyaduba u yeedhaan, balse masuuliyiinta ugu badan waa in gole-weynaha loogu yeedhaa si ummadda hortooda loola xisaabtamo. Illaa hadda shir-guddoonku cid uma yeedhin intii saddexdaas kal-fadhi socdeen. Mooshin iyo ansixin uma baahna; warqad keliya ayaad u qori kartaan shir-guddoon ahaan si raggii halkan fadhiya su'aalahooda u weydiiyaan.

Kaydka: kayd ayaa laga sheekeeyaa. Wasaaradda Beeruhu waxay tidhi wax baan soo saaraynaa, Madaxweynaha Jamacadda Camuud buu kaga khudbadeeyay, sannad ka dibna

wasiirkii beeruhu wuxuu soo bandhigay 70 kiish oo midkiiba 30 kg ah, hadana waxaa la yidhi waa raashinkii qaranka oo dhan. Dalka dhul beereed fiican buu leeyahay, balse dawladnimadu ma hoggaamiso beeraha. Meelihii wax laga beeri jiray ayaa fadhiyay, jaad baa la iibinayaa. Sagaashamaadkii marka wax la beeri jiray quruxdooda waad la yaabi jirtay. Sidaas darteed, dawladnimadu waa inay hoggaamisaa beeraha, wax-soo-saarka iyo biyaha.

Ceelashii aan soo marnay dhammaantood lama sahMin; laba jeer ayaa meel lagu mud-mudaa, dabadeedna waa laga tagaa, lacagtiina waa la qaataa. Nimanka xisaabaadka iyo hanti-dhowrka jooga waxaan leeyahay mashruuc kasta oo fashilma lacagtiisa waa in laga soo celiyaa, ee lama daayo.

Ugu dambayn, waxaan adkaynayaa in dalkan dantiisu ku jirto in doorasho dhacdo. Doorashada waa in la qabtaa sida dastuurku jidaynayo. Ciddii wax tabanaysaa mudaharaad nabadeed waa u bannaan, balse dagaal cidna xaq looguma laha, doorashadana lama diidi karo. Shir-guddoonkana waxaan leeyahay arrimaha doorashooyinka si nidaamsan ha loo kala hormariyo, masuuliyiintana ha loo yeedho. Qof kasta oo sharciga gacanta ku qaata oo hanjabaad sameeya waa in Golahan la horkeenaa. Taliyaha oo maalin dhowayd halkan ka hadlay wuxuu yidhi waa sharci-jab in xisbiyadu hadlaan ama mudaharaadaan; isaga markuu jabiyo yaa qabanaya? Ma sida reer Banii Israa'iil baynu noqonnaa—miskiinka xadka Ilaahay ayaan ku oogaynaa, taajirkana waan ka dhaafaynaa? Ilaahay miyuusan inoo rogi doonin? Intaas ayaan ku soo gabagabaynayaa. **WSC.**

**Md. Axmed Maxamuud Cabdilaahi** (10Min, 31Sec) Guddoomiyaha, Mudanayaasha, hawl-wadeennada Golaha iyo saxaafadda, **ASC**. Mahad dhammaanteed Alle ayaa iska leh. Waxa mudan in la xuso sida qaranku u gutay xuskii 31aad ee **18-ka May**, kaas oo loo qabtay si nabadgelyo iyo sharaf leh, dawlad ahaan, ciidan ahaan iyo bulsho ahaanba.

Walaalayaal, sidaad ogsoon tihiin, muddo ku dhow saddex sano waxa jiray dhibaatooyin soo noq-noqday oo is-daba-joog ah, kuwaas oo ilaa iMinka aan dhammaan. Qaar inaga gaar ah ayay ahaayeen, qaarna aynu dunida la wadaagnay. Waxa ugu horreeyay xanuunkii **COVID-19**; waxa ku xigay dagaalka ka socday **Yukrayn**, kaas oo saameeyay caalamka aynu ka mid nahay; waxa ka mid ah abaarta ilaa hadda jirta; gubashadii **Suuqa Waaheen**; iyo bulshadeenna oo hawlaheedii badankood u weecday ku mashquulidda siyaasadda, halkii diiradda la saari lahaa horumarkii uu qarankani ku gaadhi lahaa guulo waaweyn.

Arrimahan oo dhammi waa kuwo inaga yaalla in wax laga qabto. Ma aha wax cid gaar ah lagu canaanto; waa duruufo Ilaahay inoogu qaddaray, qaarna waa kuwo dabiici ah, qaarna caalami ah.

Anigoo doonaya inaan qodobadaas wax ka taabto anigoo soo koobaya, waxaan diiradda saarayaa laba qodob oo Dastuurkeenna si cad u tilmaamay: mid qeexaya qaranimada dalka, midna qeexaya awoodaha hay'adaha qaranka loo xilsaaray fulinta waajibaadka.

**Qodobka 37aad** ee Dastuurka, oo ka hadlaya awoodda iyo karaamada qaranka, farqaddiisa 1aad waxay u dhigantaa sidan:

*"Eebbaha ummadda Somaliland ku beeray geyigan waxa uu ugu deeqay awood iyo karaamo qaranimo. Shacabka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu awooddaas iyo karaamadaas sida ku cad Dastuurka ugu igmaday dawlad ku dhisnaan doonta kuna dhaqmi doonta Dastuurka."*

Farqaddiisa 2aadna waxay leedahay: *"Dhismaha Qaranku wuxuu ka kooban yahay saddex waaxood oo kala ah Xeer-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka. Kala-xadaynta awoodaha saddexdaas waaxood waxay noqon doonaan sida uu Dastuurku dhigayo, waax walbana awoodda uu Dastuurku u gaar yeelay way u madax-bannaan tahay."*

Saddexdaas waaxood mid walba waxay u madax-bannaan tahay awooddeeda. Anigoo wakhtiga dhowraya, waxaan wax yar ka taabanayaa Waaxda Xeer-dejinta. **Qodobka 38aad**, farqaddiisa 1aad, wuxuu dhigaya: *"Awoodda xeer-dejintu waxay gaar u tahay Baarlamaanka oo ka kooban laba gole, mana u wareegi karto cid kale."*

Farqadda 3aadna waxay sheegaysaa: *"Baarlamaanka xil-gudashadiisu waxa uu ku salaysan yahay Dastuurka iyo xeer-hoosaadkiisa."*

Sidaas awgeed, waxa inagu waajib ah in aynu ku shaqayno awoodaha uu Dastuurku ina siiyay iyo xeer-hoosaadkeenna, annagoo aan ku tallaabsan awoodaha ay Dastuurku siiyay waaxaha kale.

Farqadda 4aad ee isla qodobka 38aad waxay tilmaamaysaa himilooyinka ugu muhiimsan ee xil-gudashada Baarlamaanka, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- Sugidda nabadgelyada iyo ammaanka Jamhuuriyadda Somaliland, iyo u madax-bannaanida maamulka dhulkeeda, baddeeda iyo hawadeeda.
- In Jamhuuriyadda Somaliland yeelato dhammaan xeerarka ay u baahan tahay dawlad Islaami ah.
- Hirgelinta xeerarka u degsan Jamhuuriyadda Somaliland iyo xaqiijinta taabba-galka cadaaladda, si ay saldhig ugu noqoto xasilloonida guud, isu-kalsanaanta iyo iskaashiga dadweynaha.

Sidaas darteed, waajib inagu ah ayay tahay fulinta arrimahan, annagoo ka fogaanayna canaan iyo eedo ka baxsan xuduudaha awooddeena, kuwaas oo aan wax faa'iido ah soo kordhinayn.

Waxa intaas ii raacda talo-soo-jeedin ku salaysan labadaas qodob ee Dastuurka: Dastuurka Qaranku wuxuu ina siinayaa awood qaran oo lagu wada shaqeeyo si dalkan iyo dadkani u gaadhaan horumar waara. Sidaa awgeed, waa waajib ina saaran in aynu ka hortagno wax kasta oo dhaawac u gaysanaya jiritaanka qaranka ama bulshada lagu marin-habaabinayo. Sida ku cad Dastuurka, ma habboona in xubin Golahan ka mid ahi taageerto

ama muujiso wax ka hor imanaya qaranimada, jiritaanka qaranka iyo Dastuurka, ha ahaato cid kasta oo masuuliyad qaran haysa.

Ugu dambayn, waxaan ku soo gunaanadayaa in **Shir-guddoonka** iyo **Guddida Joogtada** ay gutaan awoodda shaqo ee ay xaqa u leeyihiin, gaar ahaan kala-xadaynta hawlaha guddiyada Golaha, maadaama ay mararka qaarkood isu tallaabaan. Anigoo intaas ku soo koobaya dooddayda, waan idinka mahadnaqayaa. **WSC.**

**Md. Saleebaan Diiriye Barre** (17Min, 11Sec) Shir-guddoonka Golaha, Mudanayaasha sharafta leh iyo saxaafadda, **ASC**. Waxaan is-dul-taagayaa dhowr qodob anigoo ku salaynaya xaaladda guud ee dalka.

Marka hore, waxaynu nahay golihii ugu sarreeyay xeer-dejinta; xaqiiqatan waxaynu nahay gole waayeel ah. Inkasta oo Somaliland ay 30 sano jirtay oo mararka qaarkood lagu tilmaamo dal da'yar, haddana Golahan hal sano ayuu shaqaynayay, waana gole khibrad leh.

Waxa inagu waajib ah in aynu qaadanno doorka uu Dastuurku ina siinayo, annagoo aan ka bixin waxa uu ina farayo Dastuurka qaranka iyo xeerarka ka farcama. Marka laga hadlayo dawladda iyo wada-shaqaynteeda, waa run in aynu dawladda la xisaabtanno, dabagalna ku samayno oo tilmaanno; balse ma nihin laba gole oo dagaal ku wada jira. Waa laba hay'adood oo wada-shaqaynaya. Si wada-shaqayntu u hagaagto, door weyn ayay leeyihiin shir-guddoonnada golayaasha.

Waxa ayaan-darro ah in Golaha dhexdiisa aynu isu jawaabno—qaar xukuumadda weeraraya, qaarna u jawaabaya—taas oo dhaawacaysa sumcadda Golaha. Xukuumadda waa la dhaliili karaa sida uu Dastuurku dhigayo; annaguna waan is-dhaliili karnaa, waxna waan isu sheegi karnaa, balse waxa habboon in arrimahaas lagu xalliyo wada-hadal gudaha ah, si aan loo luMin magaca, sumcadda iyo kalsoonida ay bulshadu inaga filayso.

Waxa inoo yaalla hawlo badan. Qarankan rag baa halkaa soo gaadhsiiyay, innagana waxa inaga saaran mas'uuliyad ah in aynu ka qayb-qaadanno xaaladda maanta dalka marayo, annagoo diyaarinayna xeerarka maanta qaranku u baahan yahay. Sida la og yahay, Dastuurkeenna weli waxa ku jira xeerar qabyo ah iyo kuwo u baahan dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel, si loo saxo meelaha mad-madawga ah.

Waxyaabaha muhiimka ah waxa ka mid ah gaabinta ku jirta xeerarka doorashooyinka, kuwaas oo qaarkood is-khilaafayaan. Waa in aynu si mideysan u saxno, annagoo aan af xisbi ku hadlin, balse eegayna danta guud iyo mas'uuliyadda qaran ee inaga saaran.

Waxaan sidoo kale is-dul-taagayaa qodobbo kale, gaar ahaan **abaarta**. Abaarta had iyo jeer waxa raaca biyo-la'aan. Dhaqaalaha kowaad ee dalka waa xoolaha; sidaas darteed, waa lama huraan in xooluhu helaan biyo iyo daaq. Xukuumadihii kala dambeeyay weli kama ay qaadan siyaasad cad oo ku saabsan deegaanka, biyaha iyo xoolaha. Waxaan soo

jeedinayaa in maanta dib loo eego siyaasadda guud ee biyaha iyo deegaanka, annagoo gole ahaan wax ka beddeli karna odoroska miisaaniyadda.

Waxaan caddeynayaa in miisaaniyadda qaranka—ha ahaato tii hore ee 30 bilyan ka yar ama tan maanta ku dhow 500 bilyan—ay ku socoto waddo isku mid ah. Ma qaadi karno in miisaaniyadda inta badan lagu bixiyo shidaal iyo qalab xafiiseed. Waxa loo baahan yahay in la sameeyo **mudnaan-siin (priority)**, lana caddeeyo wasaaradaha ugu muhiimsan ee u baahan taageero.

Arrin kale oo muhiim ah waa **siyaasadda biyaha qaranka**. Siyaasaddaas oo muddo 30 sano ah jirtay natiijo wax ku ool ah ma keenin. Waxa loo baahan yahay in la beddelo hab-fikirka, lana tixgeliyo qabashada biyaha roobka iyo dhismaha **dhaamamka**, halkii lagu sii tiirsanaan lahaa ceelal u baahan dayactir joogto ah. Tusaalooyin caalami ah sida Masar iyo Israa'iil ayaa muujinaya muhiimadda maareynta biyaha.

Ugu dambayn, injineerrada biyaha iyo Wasaaradda ay khusayso waa inay dib u eegaan siyaasadda hadda jirta, si loo helo xal waara oo ku saabsan biyaha, wax-soo-saarka iyo horumarka qaranka.

Waxaynu ognahay in dhaqaalaha maanta galay ceelasha dhaadheer (*boreholes*), haddii aynu ku beddeli lahayn **dhaammo**, meel walba biyo laga heli lahaa. Waxa marar badan la yidhaahdaa *Hargeysa waa bilaa biyo*—waana run. Hase yeeshee, dadka laftoodu waxay u baahan yihiin in loo sameeyo qorshe cad, maadaama qoys kasta biyaha ka soo dhacaya jiingadda gurigiisa ay ku filnaan karaan, haddii si habboon loo kaydiyo.

Sidaa awgeed, looma baahna in dawladda oo keliya lagu tiirsanaado; waxa loo baahan yahay in la hirgeliyo **qabashada biyaha roobka (rain harvesting)**. Qof kastaa gurigiisa waxa uu ka samaysan karaa barkad yar ama qol ka mid ah ayuu u adeegsan karaa, si biyaha jiingadda ka soo dhacaya loo kaydiyo. Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in si guud loo hirgeliyo **qabashada biyaha**.

Cimilada maanta dalkeenna ka jirta waxay muujinaysaa in dalku u janjeedho lama-degaan. Sababta lama-degaankaasi waa mid inagu timid gacmaheenna; ma aha wax cid kale inoo keentay. Wasaaradda Deegaanka iyo Reer-Miyigu ma ay ku filna wacyigelinta bulshada ee ilaalinta dhirta, sidoo kalena ma jirto dhaqan-gelin ku filan oo ka dhan ah jarista sharci-darrada ah.

Inkasta oo xeerar jiraa, haddana waa in si dhab ah loo dhaqan-geliyo. Si kastaba ha ahaatee, dadka in ciidan iyo xoog lagu ciqaabo mar walba xal ma aha; waxa ka muhiimsan **wacyigelin joogto ah** iyo in bulshada la fahamsiiyo saamaynta falalkooda. Marka la eego gaadhsiinta wacyigelinta, dalka maanta waxa ka jira hal idaacad oo ku taalla Hargeysa, halka shanta gobol ee kale badankoodu ka madhan yihiin idaacado. Taasi waxay keentay in dad badan oo ka baxsan magaalooyinka waaweyn aanay helin xog ku filan oo ku saabsan siyaasadaha iyo qorshayaasha qaranka, mid guud iyo mid gaar ahba.

**Arrinta Sicir-bararka**, sicir-barar ayaa dalka ka jira, waana aafo qaran oo dhab ah. Qarankeennu waxa uu si weyn ugu tiirsan yahay waxyaabaha dibadda laga keeno, taas oo u baahan in istaraatiijiyadda jirta wax laga beddelo. Waa in bulshada la gaadhsiiyo wacyigelin ku saabsan wax-soo-saarka gudaha. Inkasta oo hadal badan laga yidhaahdo beeraha, haddana waa in la xusuustaa in boqolkiiba badan oo bulshada ahi yihiin xoola-dhaqato. Sidaas darteed, waa muhiim in si cad loo baro sida beeraha loo sameeyo, lana abuuro baraarujin ku saabsan tacabka beeraha.

Qof aan aqoon u lahayn beerashada, hadal kaliya waxba kama taro. Sidaa awgeed, waxa loo baahan yahay in si weyn loo xoojiyo **wacyigelinta iyo aqoonta beeraha**, si ugu yaraan loo yareeyo ku-tiirsanaanta waxyaabaha dibadda inooga imanaya. Waa ayaan-darro in qaran muddo 30 sano jiray uu weli xabuubtiisa ka soo dejiyo dibadda.

**Ganacsatada**, anigoo ixtiraam buuxa u haya kaalinta ay ku leeyihiin horumarka dalka, haddana waxaan u soo jeedinayaa inay **dul-qaataan bulshadooda**, qiimahana qaboojiyaan ama dhimaan, si ay ula jaanqaadaan duruufaha nololeed ee jira, isla markaana ay hoos ugu eegaan xaaladda bulshada danyarta ah.

**Arrimaha Nabadgelyada**, xaaladda nabadgelyadu guud ahaan waa mid aad u wanaagsan, Alle mahaddii. Waxa mudan ammaan ciidamada kala duwan ee qaranka iyo sida ay bulshada ula barbar taagan yihiin. Hase yeeshee, waxa soo kordhay cabashooyin la xidhiidha xadhigyo sharciga ka baxsan, gaar ahaan xadhigyo habeenkii lagu sameeyo iyada oo aan muwaadiniinta maxkamad la hor-keenin.

Waxa kale oo jira warar sheegaya ciidamo tababaran oo aan la garanayn cidda ay ka amar qaataan, kuwaas oo habeenkii weerara saraakiil, xubno xisbiyo ka tirsan, muwaadiniin ama saxaafadda. Arrintan weli kama jawaabin booliiska, badhasaabka gobolkana kama jawaabin, sidoo kalena wasiirka arrimaha gudaha kama jawaabin ciddan ciidamadan ka amar qaataan iyo halka ay ka yimaaddeen. Arrintani ma aha mid la aqbali karo, mana habboona in Hargeysa ka jiraan ciidamo aan la garanayn cidda maamusha.

Marka laga hadlayo xadhigga, xeerar cad baa u yaalla. Dastuurku waxa uu dhigaya in ciidanka booliisku yahay ilaaliyaha guud ee shuruucda dalka. Sidaa darteed, ciidanka booliiska waxa la gudboon inay si buuxda u ilaaliyaan shuruucda dalka, kana fogaadaan tallaabooyin siyaasadaysan. Sidoo kale, waxa loo baahan yahay in **dib loo eego Xeerka Ciidanka Booliiska**.

Waxa jira saxafi xidhnaa muddo dhowr bilood ah, kaas oo markii maxkamad la hor-geeyay lagu go'aamiyay in aanu wax dambi ah lahayn, isla markaana la amray in la sii daayo. Hase yeeshee, ilaa hadda wuu xidhan yahay, lamana oga ciddii xukuntay iyo maxkamadda la hor-geyn doono.

**Madaxweynaha Qaranka**, maadaama uu yahay odaygii dalka iyo ilaaliyaha sharciga, waxaan u soo jeedinayaa inuu ilaaliyo shuruucda dalka, isla markaana uu sii daayo saxafiga xidhnaa, ama haddii kiis kale jiro, si sharci ah loogu soo oogo.

**Arrimaha Dibadda**, Madaxweynaha waxa lagu bogaadinayaa safarkii uu Maraykanka ku tagay, qaabkii loo soo dhaweeyay iyo sida loo qaabilay, taas oo ahayd tallaabo horumar leh. Waxa kale oo dhawaan dalka yimid wafti Maraykan ah oo Hargeysa ka hadlay. Si kastaba ha ahaatee, hadallada qaar ee ka soo baxay safiirka Maraykanka u fadhiya Soomaaliya waxay ahaayeen kuwo aan ku habboonayn, inkasta oo warbixintiisii Madaxweynaha la mid ahayd.

Waxaan ugu baaqayaa Madaxweynaha iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda in marka kulamo noocaas ah la galayo, hadallada saxaafadda la sii miisaamo, isla markaana wada-xaajood (*negotiation*) hore loo sameeyo, si looga hortago warar dhaawici kara sumcadda Madaxweynaha iyo tan dalka.

Ugu dambayn, waxa mudan in la bogaadiyo qaabkii heer qaran loo agaasimay munaasibaddii **18-ka May**, taas oo si weyn oo sharaf leh dalka oo dhan looga dabaal-degay. Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa guud ahaan shacabka, anigoo xasuusinaya in Somaliland xaq u leedahay inay ka mid noqoto shucuubta caalamka.

Waxaan ugu baaqayaa beesha caalamka in ay tixgeliso xaqa Somaliland u leedahay inay la macaamisho hay'adaha caalamiga ah, la xidhiidho dawladaha kale, isla markaana muwaadiniinteedu si xor ah ugu dhoofaan baasaboorkooda, gaar ahaan kuwa caafimaad u baahan.

Waa ayaan-darro in muddo 30 sano ah muwaadin caafimaad u baxayaa uu ku khasbanaado baasaboor dal shisheeye. Waxaan rajaynayaa in sannadaha soo socda arrintaasi dhammaan doonto, Somalilandna ay noqon doonto qaran si buuxda uga mid ah waddamada dunida. Bulshada waxaan ugu baaqayaa inay u adkaystaan duruufaha jira, ilaaliyaan midnimadooda iyo amnigooda, isla markaana meel uga soo wada jeestaan qaranimadooda.

**Md. Axmed Jaamac Saalax** (19 MIN, 09 Sec): – Qodobka koowaad ee aan rabo inaan ka hadlo waa masiibadii dhacday 28-kii March deegaannada Gobolka Saraar, gaar ahaan Degmada Oog, halkaas oo ay ka da'een roobab wata duufaanno xooggan. Roobabkaasi waxay geysteen khasaaro aad u badan, waxaana ugu weyn burburkii soo gaadhay xarumihii dawladdu lahayd, sida cusbitaalkii guud, xannaanadii, saldhiggii booliiska iyo xarumihii dawladda hoose, kuwaas oo dhammaantood burburay. Ilaa hadda wax gurmad ah oo ay dawladdu ka qabatay ma jiro.

Waxaynu ognahay in marka ay masiibo timaaddo ay waajib tahay in si degdeg ah loo gurmado dadka ay saamaysay, hase yeeshee ilaa iyo hadda wax gurmad ah lama samayn. Sida xogta aan hayo muujinayso, laga bilaabo 28-kii March ilaa maanta aan hadalkan jeedinayo, waxba lagama qaban, lamana gurman. Siddeetan iyo laba (82) qoys ayaa guryahoodii waayay. Waxaan soo jeedinayaa in xukuumaddu arrintan si gaar ah ugu dhago-nuglaato, isla markaana ay si degdeg ah wax uga qabato xaaladda dadkaasi. Meelaha ugu daran ee iMinka jira waxa ka mid ah xaruntii hooyada iyo dhallaanka,

halkaas oo mararka qaarkood ay dhacdo in hooyooyin lagu umuliyo dayrka dhexdiisa, sababo la xidhiidha laydh la'aan iyo burburka xarunta. Waxaan soo jeedinayaa in Wasaaradda Caafimaadku si degdeg ah uga hawlgasho, isla markaana dadkii waxyeelladu soo gaadhay loo gurmado si degdeg ah.

Waxaan kaloo rabaa inaan ka hadlo xaaladda Komishanka Doorashooyinka Qaranka. Sida aynu wada ognahay, beryahan waxa ka taagan arrin aan wanaagsanayn. Mushkiladda jirta waxa sal u ah in dalkeenna mar kasta oo doorasho soo dhowaato ay dhacdo qalalaase siyaasadeed, sababta ugu weyn ee arrintaasina tahay muddo-kordhin. Komishanka Qaranku waxa uu ka kooban yahay toddoba xubnood oo madax-bannaan, kuwaas oo doortay guddoomiye iyo guddoomiye-ku-xigeen. Sida sharcigu dhigayo, waxay xaq u leeyihiin inay mar kale doortaan guddoomiye cusub.

Haddaba, waxa is-weydiin mudan farqiga u dhexeeya guddoomiyihii hore, Md. Cabdirashiid Riyo-raac, iyo Marwo Kaltuun oo iMinka loo doortay si sharci ah. Farqigaasi waxa uu ku salaysan yahay dhowr arrimood. Marka hore, waa gabadh, waana markii ugu horreysay ee xafiis heer qaran oo sare loo magacaabo haweenay. Runtii, way u qalantaa intaas iyo in ka badanba. Sida aynu wada ognahay, waa xubinta ugu waayo-aragnimada badan lixda xubnood ee hadda jooga, marka laga reebo xubintii hore ee is-casishay.

Waxaynu ognahay in markii komishankan la doortay, muddo ku dhow laba sano ka hor, labada xisbi mucaarad ay diidanaayeen guddoomiyihii markaa, Md. Cabdirashiid Riyo-raac, hase yeeshee wakhtigaas ma jirin xubin komishan ah oo is-casishay. Maanta se, waxa aynu arkaynaa dhacdadii ugu horreysay ee noocaas ah; hal xubin ayaa is-casishay, xubin kalena waxa la sheegayaa, inkasta oo aanan si buuxda u hubin, inay is-casilaaddeedii u gudbisay Madaxweynaha, isla markaana ay tahay guddoomiye-ku-xigeen.

Waxa kale oo la og yahay in Madaxweynaha uu magacaabay guddi soo baadha eedeymaha musuq-maasuqa. Ka hor intaasna waxa jiray Guddida Dabagalka Hantida Qaranka, taas oo hore loo magacaabay, isla markaana bixisay warbixin cad oo ay ku sheegtay inaanu jirin wax musuq-maasuq ah. Haddaba, su'aashu waxay tahay sababta iMinka guddi kale loo magacaabay. Aniga aragtidayda gaaban, waxaan aaMinsanahay in arrimahan oo dhami ay salka ku hayaan muddo-kordhin.

Sabab kale oo la tuhunsan yahay waxa weeye in Marwo Kaltuun laga diidan yahay xilka guddoomiyenimo, maadaama ay isku qoys ama isku reer yihiin Madaxweynaha, si aan hadhow loo odhan Madaxweynaha ayaa si reeraysan u maamulay. Sidoo kale, waxaan aaMinsanahay inay ka khibrad badan tahay, kana daacad badan tahay guddoomiyihii hore, isla markaana ay tahay gabadh adag oo aan si fudud wax loo marsiin karin.

Sababta saddexaad ee la tilmaamayo waxa ka mid ah in ninkeeda oo ah xildhibaan mucaarad ah uu doorashadii dhowayd Madaxweynaha si adag u dhaliilay, inkasta oo aanan arrintaas ku raacsanayn. Waxaa la aaMinsan yahay in arrintaasina qayb ka tahay sababaha gabadha loo diidan yahay.

Haddaba, Mudane Madaxweyne, adigaa Madaxweyne ka ah waddankan, adigaa qabtay doorashadii ugu quruxda badnayd. Maanta qaranku waxa uu kaa sugayaa inaad mar kale doorasho u qabato. Waxaan ogahay in cabsi jirto, balse waxa lagaa filayaa inaad faragelinta ka daysid Komishanka Doorashooyinka, una diyaar garowdo in doorasho dalka ka dhacdo 13-ka November.

Waxaan kaloo doonayaa inaan ka hadlo Xeerka Ciqaabta Guud, kaas oo bulshadeennu aad uga cabanayso, dhibaato badanna ku haya. Xeerkan waxa lagu ansixiyay 16-kii December 1962, waxana uu dhaqan galay 3-dii April 1964. Xeerkan waxa uu ka soo farcamay daraasado ay sameeyeen maxkamadihii Soomaaliyeed, iyadoo qoraalkii ugu horreeyay ee dib-u-eegista xeerka la diyaariyay 1957-kii, kuna salaysnaa nidaamkii qaanuun ee ka jiray Koonfurta Soomaaliya xilligii Talyaanigu gumaysan jiray. Waxa lagu sameeyay fududayn la jaanqaadaysa dhaqanka iyo caadooyinka bulshada, isla markaana lagu dhisay nidaam cusub oo qeexaya dambiyada iyo ciqaabahooda, hase yeeshee curintaas si buuxda looma daba gelin, sababo siyaasadeed awgood.

Ka dib markii Somaliland ay dib ula soo noqotay madax-bannaanideedii 18-kii May 1991 iyo aftidii dastuurka ee 2001, dastuurku waxa uu caddeeyay in si ku-meel-gaadh ah loogu sii dhaqmo xeerarkii laga dhaxlay Jamhuuriyaddii Soomaaliya, inta aanay ka hor imanaynin dastuurka iyo shareecada Islaamka. Sidaas darteed, Xeerka Ciqaabta Guud waxa uu noqday xeer ay maxkamadaha Somaliland ku shaqaynayeen muddo ku dhow 30 sano, iyadoo golayaasha xeer-dejinta, oo Golahan ka mid yahay, ay ka gaabiyeen inay wax ka beddel iyo kaabis ku sameeyaan xeerkan gaboobay.

Xeerka Ciqaabta Guud iyo Habkiisa, oo la sameeyey badhtamihii qarnigii hore, waa qaanuun gaboobay oo aan la jaanqaadi karin dambiyada casriga ah ee maanta dalkeenna ka dhaca. Taasi waa sababta ay maalin kasta golayaasha xeer-dejinta iyo xukuumaddu ugu khasbanaadaan inay sameeyaan xeerar ciqaabeed oo gaar ah, marka laga waayo xeerarkan gaboobay meel lagu xukumo dadka gala dambiyada casriga ah. Dambiyada la xidhiidha budhcad-badeedda iyo khatarta amniga badaha laguma helin xeerkan, sidaas awgeedna xeerar ciqaabeed oo gaar ah ayaa loo sameeyey. Sidoo kale, kalluumaysiga sharci-darrada ah xeer gaar ah kuma jiro, dambiyada lagu galo internet-ka iyo weerarrada cyber-ka xeerku ma tilmaamayo, maydhista lacagahana kuma jirto. Sidaa awgeed, bangigu ayaa diyaariyey xeer ciqaabeed ku saabsan maydhista lacagaha, kaas oo uu ansixiyey golihii naga horreeyey.

Waxa jiray xaalado dad lagu qabtay iyagoo ka ganacsanaya bini-aadam, hase yeeshee markii dambe la waayey xeer lagu xukumo, sidaas darteedna waa la sii daayey. Maanta, xeerka ka hortagga iyo ka ganacsiga dadka ee aynu ansixinnay, kana soo noqday Golaha Guurtida, waxa uu noqonayaa xeer ciqaabeed lagu maamuli doono arrimahaas.

Xeerkan gaboobay waxa uu khatar ku yahay qaranimadeenna. Jamhuuriyadda Somaliland, nidaamka dawladnimo ee ay qaadatay, iyo xeerkan ciqaabeed isma waafaqayaan. Ugu horrayn, waa xeer ay iska leedahay dawladda aynu jaarka nahay ee Soomaaliya, isla

markaana laga dabaqo dhammaan maamulada xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya. Dunidu way ogtahay in nidaamkeenna sharci iyo kan Soomaaliya ay weli ku dhex-milmeen, gaar ahaan xeerarka garsoorka ee lagu shaqeeyo, kuwaas oo ay ka mid yihiin Xeerka Ciqaabta Guud iyo Habkiisa, iyo Xeerka Madaniga ah iyo Habkiisa. Haddii aad eegto jaldiga xeerkan, waxa ku qoran "Dawladda Federaalka Soomaaliya".

Maalin kasta maxkamadaheenna waxa la horkeenaa dad lagu eedaynayo falal ka dhan ah midnimada qaranka, waxaana lagu eedeeyaa laguna xukumaa xeerkan. Xeerkan, boqolkiiba boqol, waxa uu ka hor imanayaa mabaa'diida xuquuqal-insaanka ee dastuurku damaanad qaaday.

Xeerkan ciqaabta guud waxa uu soo maray marxalado kala duwan iyo isku dayo wax-ka-beddel. Sida xogta aan hayo, mar Golaha Wakiillada ayuu ajandaha galay, dooddiisii markii dambe waa la joojiyey sababo siyaasadeed awgood. Waxa uu gacanta ku jiray Guddida Dib-u-Habaynta Shuruucda oo uu aasaasay Madaxweyne Siilaanyo, ka dibna xeer-nidaamiye Madaxweyne ayaa lagu hoos geeyey Wasaaradda Dastuurka iyo Xidhiidhka Golayaasha.

Maanta waxa aynu haysannaa khubaro iyo sharci-yaqaanno aqoontoodu gaadhay heer PhD, aqoontii qaanuunkuna inta badan way diyaar tahay. Sidaa awgeed, maadaama shaqadeenna koowaad tahay xeer-dejinta, waa in aynu xoogga saarno samaynta xeer ciqaabeed qaran oo aynu innagu leenahay, maadaama aynu haysanno aqoon iyo dhaqaale labadaba. Xitaa guddi gaar ah ayaa loo saari karaa hawshaas.

Xalayto, muwaadin reer Jabuuti ah oo ku nool Magaalada Gabiley ayaa lagu xidhay xabsiga Gabiley. Muwaadinkaasi waxa uu inta badan fikirkiisa xorta ah kaga hadlaa baraha bulshada. Habeenkaas, isaga oo cod dheer ku hadlaya, waxa uu sheegay inaanu garanayn sababta loo xidhay, isla markaana uu yahay muwaadin reer Jabuuti ah, waliba abti u ah reer Somaliland, gaar ahaan reer Gabiley. Waxa uu ku baaqay inaan loo dhiibin sida kiiska Qalbi-Dhagax oo kale.

Waxaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo hay'adaha amniga u soo jeedinayaa in haddii muwaadinkaasi si sharci ah dalka ugu sugan yahay, isla markaana uu galay wax dambi ah, lagu mariyo waddadii sharciga ahayd, balse aan si siyaasadaysan loo maamulin, isla markaana aan waddan kelitalis ahi ka jirin. Qof kasta oo Somaliland joogaana waxa uu xor u yahay inuu muujiyo fikirkiisa, inta uu sharciga waafaqsan yahay.

Waxa kale oo aad ogtihiin in dalka uu ka jiro sicir-barar aad u sarreeya, oo maraya halkiisii ugu sarreeyey. Khudbaddii sannadlaha ahayd ee Madaxweynaha ee dhowaan la jeediyey waxa lagu sheegay in sicir-bararku hoos u dhacay 3%, hase yeeshee anigu waxaan aaMinsanahay in arrintaasi aanay xaqiiqo ahayn. Haddii aad maanta suuqa tagto oo aad baadho qiimaha maciishadda, gadbadda daqiiqda oo saddex bilood ka hor ahayd 20 doollar, maanta waxay maraysaa 36 doollar, taas oo ah korodh dhan 16 doollar, una dhiganta boqolkiiba 80. Gadbadda bariiska oo saddex bilood ka hor ahayd 26 doollar,

maanta waxay noqotay 40 doollar, korodhkeeduna waa 14 doollar, taas oo u dhiganta boqolkiiba 53. Gadbadda sonkorta oo saddex bilood ka hor ahayd 23 doollar, maanta waxay noqotay 40 doollar, korodhkeeduna waa 13 doollar, oo u dhiganta boqolkiiba 48. Sidaas darteed, waxaan is waydiinayaa xukuumaddu halka ay ka keentay sheegashada ah in sicir-bararku hoos u dhacay 3%.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, markii aynu ansixinaynay miisaaniyadda, waxa halkan noo yimid Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Hanti-Dhawraha Guud ee Qaranka. Waxaan waydiinnay lacag malaayiin doollar ah oo aan aaMinsanahay inay meel khaldan ku dhacday, isla markaana la lunsaday. Lacagtaasi waa lacagta laga qaado coronaha, oo muddo laba sano iyo ka badan la ururinayey, balse aan ku dhicin khasnadda dawladda.

Waxaan Wasiirka Maaliyadda si gaar ah u waydiiyey sababta ay lacagtaasi labadii miisaaniyadood ee u dambeeyey ugu soo geli weyday, wuxuuna ii sheegay in sannadkan lagu daray. Waxaan mar kale waydiiyey labadii sano ee ka horreeyey halka ay lacagtaasi martay, wuxuuna ku jawaabay in Hanti-Dhawraha Qaranka laga sugayo xisaab-xidhka. Waxaan haddana waydiiyey haddii xisaab-xidhka lagu waayo, meel kale oo loo raaci doono, wuxuuna sheegay in Wasaaradda Caafimaadka loo raaci doono.

Sidaad ogtihiin, toddobaad ka dib waxa halkan yimid Hanti-Dhawraha Guud ee Qaranka, isla su'aashaas baan waydiiyey. Waxa uu sheegay in lacagtaasi aanay ku jirin xisaab-xidhka, kii horena aan la keenin, isla markaana wasiirku sheegay inaanay lacagtaasi soo gaadhin. Wuxuu intaa ku daray in arrinta la gelin doono hanti-dhowr, isla markaana natiijada lala wadaagi doono Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka. Ilaa hadda wax natiijo ah lama wadaagin, lacagtaasina meel ay ku maqan tahay lama oga.

Arrinta jirta waxa weeye in lacagtaasi ay hore ugu dhici jirtay akoon gaar ah oo aan sharci ahayn, balse saddexdii bilood ee u dambeeyey ay ku dhacaysay akoon ay Wasaaradda Maaliyaddu xisaabiso. Sidaas awgeed, waxa muuqata in meelaha qaar musuq-maasuq laga indho-lalinayo, halka meel aan jirin laga baadhayo. Tusaale ahaan, farqiga u dhexeeya Komishanka Doorashooyinka iyo meelaha kale ee musuq-maasuqa ka jiro.

Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa, Mudane Madaxweyne, in halkii aad ku wareegi lahayd hay'ad ama komishan aan musuq-maasuq samayn, sida ay sheegtay Hanti-Dhawrka Qaranku, aad baadhitaan ku samayso meelaha ay dhab ahaan ka jirto eedda musuq-maasuq. Haddii Hanti-Dhawrka Guud uu Komishanka geliyey cid la baadhayo, waxa waajib ah in la baadho Guddoomiyaha Komishanka iyo Agaasimaha Komishanka. Haddii cid musuq-maasuq laga baadhayo, labadaa qof ayaa mudan in la baadho.

Ugu dambayn, waxaan soo jeedinayaa in meel kasta oo u baahan in shaqo laga qabto si dhab ah looga qabto. Wabillaahi tawfiiq.

**Md. Qaasim Aadam Saleebaan** (09 MIN, 02 Sec): – Bismillaahi, ASC. Waxaan filayaa inaynu ku jirno dooddeennii xaaladda guud ee dalka. Waa muhiim in Shir-guddoonka iyo

qaybaha u qaabilsan ururinta xogtu ay inoo habeeyaan xogta ka soo baxaysa Golaha, maadaama ay inta badan noqoto hadal, halka qodobbada ku jira ay kooban yihiin. Waxaa loo baahan yahay in qodobbadaas muhiimka ah la kala saaro, ka dibna laga soo saaro go'aan gole, si aynaan u noqon gole isagu is-tumaya oo maalin dhan hadal keliya ku mashquula, iyadoo aan wax natiijo ahi ka dhalan. Gole ayaynu nahay, sharafta goleheenuna waxay ku jirtaa in doodaha iyo xaaladda guud ee dalka ay wax la taaban karo ka soo baxaan.

Ugu horreyn, waxaan la wadaagayaa shacabka Jamhuuriyadda Somaliland hambalyada sannad-guurada 31aad ee ka soo wareegtay gooni-isu-taaggii Somaliland 18-kii May. Waxaan leeyahay sannad-guuro wanaagsan, hambalyo, hambalyo.

Waxaan u gudbayaa arrinta amniga. Sidaan hore u sheegay, xaalad amni ayaa ka jirta qaybo ka mid ah dalka. Waxaan si gaar ah u xusay Gobolka Sool, halkaas oo xaalad amni darro ka jirto, isla markaana maalin walba wiil ama gabadh hal-door ahi ku dhimanayaan. Waxaa is-weydiin mudan in ciidamadii ugu badnaa ee Somaliland ay joogaan Gobolka Sool, haddana dhimashadii ugu badnayd ay halkaas ka socoto. Sidaa awgeed, waxaan qabaa in Guddida Arrimaha Gudaha iyo Amniga ee Golaha ay arrintaas si gaar ah u daba-galaan, isla markaana hay'adaha ay khusayso ay warbixin cad inoo soo celiyaan. Haddii taasi dhici weydo, dadkii gobolkaasi ka fursan mayso inay la hadlaan, isla markaana ay amnigooda gacmahooda ku qaataan.

Arrinta abaaraha, abaartu weli way ka jirtaa dalka. Gole ahaan waxa waajib inagu ah inaan u ducayno, isla markaana roob-doon u akhrino deegaannada abaartu ka jirto. Meelo badan ayaan weli roob helin, halka meelo kalena ay roobab ka da'een. Meelaha roobku helay waxaan Ilaahay SWT uga baryaynaa inuu u siyaadiyo, meelaha aanu roobku helinna waxa xil inaga saaran yahay inaan Ilaahay uga baryo inuu roob u keeno.

Arrinta Suuqa Waaheen, waa run in hanti badan oo ay lahaayeen reer Somaliland ay ku luntay. Waxaan dhawaan booqday suuqa, waxaanan indhahayga ku arkay khasaaraha baaxadda leh ee dhacay. Gole ahaan waxa xil inaga saaran yahay inaan kaalin muuqata ka qaadanno sidii suuqaasi dib ugu istaagi lahaa, kaalintaasina way bannaan tahay in Goluhu si dhab ah uga qayb-qaato.

Arrinta sicir-bararka, waa qodob kale oo ka mid ah xaaladda dalka. Sida xogtu muujinayso, wax walba waa qaaliyoobeen. Xukuumadda waxa waajib ka saaran yahay inay wax ka qabato sicir-bararka. Waxaan hubaa inay hayaan aqoon ku filan oo ku saabsan qaababka looga hortago sicir-bararka, ha noqoto in cashuuraha la dhimo ama in xukuumaddu si toos ah uga hawlgasho keenista raashin ama shidaal meelaha culaysku ka jiro, iyada oo kharash gelinaysa. Waxaan aaMinsanahay in hay'adaha u xil-saaran ay arrimahaas aqoon u leeyihiin, waxaana ugu baaqayaa inay soo af-jaraan culayska sicir-bararka ee maalin walba sii kordhaya.

Arrimaha saxaafadda, waa arrin dhab ah oo ka mid ah culaysyada dalka ka jira. Waxaan ku faraxsanahay inaan ka mid ahaa xubnihii maanta saxeexay diyaarinta Xeerka Saxaafadda. Saxaafadda waxaan ka rajaynaynaa inay noqoto mid u hoggaansanta xeerkaas. Saxaafaddu waa indhaha iyo dhagaha bulshadeenna iyo caalamkaba, waxaana doonaynaa in wax wanaagsan ay ka soo baxaan. Waa xil iyo waajib saaran xubnaha Golaha inay ka hawlgalaan arrintaas.

Qodobka ugu dambeeya ee aan dooddayda ku soo gunaanadayo, waxaan u arkaa inuu yahay mid maanta u baahan inaan u xidhanno koofiyad dhaqan. Muranka sharci ee dalka ka jira waxa laga yaabaa inaan xal u helno marka aynu u adeegsanno dhaqan, maadaama aynu aragnay in dastuurkii iyo xeerarkii dalku ay marar badan laalaadeen. Dastuurka iyo xeerarku dhammaantood waxay ina siiyeen jihooyin iyo waddooyin cad oo ku saabsan xil-muddeedyada hay'adaha qaranka, hase yeeshee waxa muuqata in xeerarkaas badankood la baal maray.

Sida muuqata, mar kasta oo hay'ad qaran ay soo gaadho dhammaadka xil-muddeedkeeda, waxa kaliya ee laga fekeraa waa xil-kordhin. Sida uu walaalkay Xildhibaan Guruuje sheegay, waxa muuqata is-jiid-jiid u dhexeeya ururrada mucaaradka oo dhinac ah, isla markaana ka soo jeeda deegaan isku mid ah, iyo xukuumadda oo dhinac ah. Sidaa awgeed, waxaan caddeynayaa inaanan ka tirsanayn labada dhinac midna, mana aha xukuumadda iyo xildhibaannada taageeraya, mana aha mucaaradka iyo dhinacyada kale.

Waxa lama huraan ah in maanta aynu ka biyo-diidno xaaladdan, taas oo aan uga jeedo in loo baahan yahay xal dhaqan oo dhex-gala muranka, ka hor intaanu khilaafku gacanta ka bixin. Waxaa loo baahan yahay inaan u xidhanno koofiyadaha dhaqanka. Sida uu Xildhibaan Guruuje sheegay, maaha in xildhibaannadu ay laba dhinac u kala raacaan, balse waa xil inaga saaran inaan raadino xal labadaa dhinac isu keeni kara. Aragtideenna iyo ra'yigeennaba waanu leenahay, balse waa inaan ku hawlgalno xal-raadinta iyo dhexdhexaadinta, anagoo koofiyadda dhaqanka qaadanayna, idanka Ilaahay. Aad baad u mahadsan tihiin. Golaha waan salaamayaa. WSC.

---

**Md. C/kariim Aadam Cumar (10 MIN, 01 Sec): –** Arrinta abaarta in badan baa laga hadlay, xildhibaanno badanna way ka hadleen, balse waxa loo baahan yahay in la is weydiiyo sida aynu uga hortagi karno abaarta. Runtii Ilaahay SWT ayaa kaliya ka dulqaadi kara abaarta, balse annaga maxaynu ka qaban karnaa? Waxaa sidoo kale meesha taalla in ay jirtay guddi qaran oo abaarta u xilsaarnaa, balse ilaa hadda guddidaasi si cad umay hor iman shacabka, kamana warbixin wixii ay ururiyeen, wixii ay qabteen, sida ay u bixiyeen, iyo qorshaha ay iMinka ku hawlgalayaan.

Sidoo kale, abaartu waxay galayso sannadkeedii labaad, mana jirto qiimayn rasmi ah oo laga sameeyey deegaannadii ay saamaysay, xogtaasna lama wadaagin shacabka. Waxaan soo jeedinayaa in gole ahaan iyo xukuumad ahaanba la isugu yimaaddo arrinta abaarta,

isla markaana loo sameeyo qorshe cad oo lagaga hortagi karo, maadaama cabasho keliya aanay xal noqonayn. Waxaan kaloo soo jeedinayaa in Guddida Qaran ee Abaaruhu ay si furan ugu hor yimaaddaan shacabka, una sheegaan halka ay wax marayaan iyo heerka ay abaartu taagan tahay.

Arrinta sicir-bararka, waa arrin caalami ah oo dunida oo dhan ka dhacday, mana aha mid innaga keliya na saameysay. Sida aynu ognahay, dagaallo caalami ah iyo xanuunno hore u dhacay ayaa door weyn ku lahaa sicir-bararka. Dagaalka u dhexeeya Ukraine iyo Ruushka wuxuu saameyn ku yeeshay ku dhowaad 25% dunida, ha noqoto dhinaca maciishadda, dhaqaalaha ama shidaalka. Haddii uu dagaalku sii socdo, waxa la filayaa in saamayntu gaadho ilaa 50%.

Dal walba wuxuu isku dayayaa inuu xajisto waxa uu haysto, gaar ahaan raashinka daruuriga ah. Haddaba, Somaliland ahaan, maxaynu haysannaa oo aynu ku tiirsanaan karnaa haddii xaaladdu sii adkaato? Waa su'aal u baahan in aynu si dhab ah isu weydiino. Dalal badan oo dunida ah waxa ay ku tiirsan yihiin wax-soo-saarka dhulkooda, tusaale ahaan Itoobiya oo aynu jaarka nahay, waxay ku tiirsan tahay ilaa 80% wax-soo-saarkeeda gudaha. Iyagu waxay ku xisaabtamaan cunista iyo isticmaalka waxa dalkooda ka soo baxa, halka inaga 1.5 doollar aynu koob sharaab ah kaga cabno hudheel, halka qoysas kale ay ku nool yihiin wax ka yar intaas maalintii

Waxaan u baahan nahay, qaran ahaan, in qorshe cad laga yeesho arrintan, isla markaana xukuumaddu ay yeelato barnaamij rasmi ah oo ay ku dadaasho una diyaargarowdo sidii ay dadka ugu jihayn lahayd hab ay wax ula soo bixi lahaayeen, si ay isu daboolaan baahiyahooda aasaasiga ah.

Arrimaha doorashooyinku waa mushkilad taagan oo caqabad ku ah dimuqraadiyadda iyo nabadgelyada uu dalkani ku naaloodo. Somaliland-na waa shaashadda kaliya ee aynu ku faanno, taas oo ah doorashooyin xor iyo xalaal ah. Sannadkan waxa inagu soo food leh saddex doorasho oo sharci ah, kuwaas oo ay si cad u dhigayaan dastuurka iyo shuruucda ka farcanta. Arrinta keliya ee taallaa waa in doorashooyinka la qabto. Haddii aanay doorashooyinku qabsooMin, dastuurku waxa uu waajibiyey shuruudo dastuuri ah oo cad. Cidda masuulka ka ah qabashada doorashooyinkuna waa Madaxweynaha Qaranka.

Laba qodob oo keliya ayaa Madaxweynaha laga sugayaa:
Inuu caddeeyo wakhtiga rasmiga ah ee ay doorasho walba dhici doonto, saddexda doorashoba, iyo inuu caddeeyo sababta aanu u qaban karin, haddii ay jirto, sababahaas oo ah kuwa dastuurku dhigayo. Wixii intaas ka baxsanna waa maroorsasho awoodeed, ku-tagri-fal sharci, iyo awood uu madaxweynuhu si khaldan ugu adeegsanayo xilkiisa.

Waxaan doonayaa inaan ka hadlo arrin maalin dhowayd ka dhacday Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland. Arrintaasi waxay ahayd in 17-kii May madaxweynuhu iclaamiyey shir lagaga wada tashanayo khilaafkii ka dhashay qabashadii munaasibaddii 18-ka May. Cidda shirka iclaamisay waa Madaxweynaha Qaranka, madashuna waa Qasriga

Madaxtooyada oo ah halka looga taliyo Somaliland. Mawduuca laga hadlayayna waa 18-ka May, oo ah maalinta qaranimada Somaliland, isla markaana ay wada leeyihiin dhammaan shacabka Somaliland.

Madaxweynuhu waxa uu u yeedhay oo uu casuumay dad uu u arkay inay wax ka go'aan ama wax ka qaban karaan. Sida aad wada aragteen, madaxweynuhu waxa uu u yeedhay 11 qof, isaga marka laga reebo waxay noqdeen 10 qof, dhammaantoodna waxay ahaayeen dad isku reer ah. Baraha bulshada waxa lagu baahiyey sawirro muujinaya 10 nin oo isku reer ah oo go'aan ka gaadhaya arrin masiir u ah guud ahaan ummadda reer Somaliland.

Waxaan is weydiinayaa: madaxweynuhu ma wuu garan waayay madaxweyne-ku-xigeenkiisii, oo ah qofka labaad ee dalka, kaas oo xilka la wareegi lahaa haddii madaxweynuhu maqnaado? Jawaabtu maya ayay u badan tahay. Waxayse u muuqataa in madaxweynuhu yahay nin si badheedh ah u qaata go'aankiisa, isla markaana aaMinsan in go'aanku cid gaar ah ka go'o.

Sidoo kale, madaxweynuhu ma wuu garan waayay inuu u yeedho Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, oo ah hay'adda aynu ku fadhinno? Labadaas qof haddii ay joogaan, sawirka la baahin lahaa aad buu uga qurux badnaan lahaa kii la arkay. Sawirka hadda muuqda waxa ka dhex muuqda fikrad ah in reer gaar ahi yahay muxaafid, reer gaar ahi yahay mucaarid, reer gaar ahi yahay mujaahid, isla markaana reer gaar ahi wax diidi karo waxna yeeli karo. Taasi waa aragti khaldan oo aan u qalMin qarannimada Somaliland.

Madaxweynaha waxaan leeyahay: arrintaas kaa yeeli mayno, kuguna taageeri mayno. Sidoo kale caalamkuna kaa yeeli maayo, sababtoo ah Somaliland waa qaran ay wada leeyihiin dhammaan muwaadiniinteedu. Waxaan kaloo aaMinsanahay in Golaha halkan fadhiya aanu marnaba yeelayn arrintaas.

Aad baad u mahadsan tihiin. Wabillaahi tawfiiq.

**Md. Maxamed Cabdi Ibraahim (Timo-jilic)** (09 MIN, 39 Sec): – Bacda salaam. Arrimaha ugu mudan ee aan isleeyahay maanta waa biyo-la'aanta Hargeysa. Waa arrin aad u culus, maadaama ku dhowaad hal milyan iyo laba boqol oo kun oo qof ay ku haraadsan yihiin caasimadda, gaar ahaan 20-kii sano ee u dambeeyey. Hawlo badan oo qaranku qabtay iyo kaalmo ay beesha caalamku inaga siisayba way jireen, balse arrinta ugu muhiimsan ee wali taagan ayaa ah in ku dhowaad 30 ceel oo ku yaalla hareeraha magaalada la geliyo beebab tayo leh iyo bamamka ugu wanaagsan, kuwaas oo midkiiba qiimihiisu yahay ku dhowaad 12,000 doollar ama ka badan, isla markaana soo saaraya qiyaastii 200 mitir kuyuubik. Taas macnaheedu waa in 30-kaasi ay soo saari karaan 60,000 mitir kuyuubik 10-kii saacadoodba, isla markaana biyahaasi gaadhaan magaalada ilaa agagaarka garoonka diyaaradaha. Taasi waa soo-jeedintayda.

Qodobka labaad waa sicir-bararka, oo aynu ognahay inuu wali sii kacayo, ha noqdo mid gudaha ah ama mid ka dhashay duruufaha dibadda sida dagaallada socda. Waa arrin u baahan daraasad qoto dheer iyo wax ka qabasho degdeg ah. Qiimaha lacagta qaranka

marka loo eego doollarka wali wuu kacayaa, sicir-bararkuna waxa uu leeyahay laba nooc: qiimo-dhac (devaluation) iyo korodhka sicirka (inflation). Waxaa jira arrimo dabiici ah oo saameyn ku leh, balse waa in si cilmiyeed loo wajahaa.

Arrin kale oo muhiim ah waa liisaska shaqaalaha mutadawiciinta ah, ha noqoto dhinaca caafimaadka, waxbarashada ama xafiisyada dawladda. Waxaa jira dad qaata mushahar iyo gunno labadaba, qaar qaata gunno keliya, qaar mushahar keliya, iyo qaar aan helin midna. Dadkaas liiskooda waxa loo baahan yahay in wasaaraduhu soo gudbiyaan, si marka miisaaniyadda sannadka dambe la diyaarinayo loogu daro qorshaha qaranka.

Arrinta dhismaha Dekedda Maydh wali waxay u baahan tahay warbixin cad, maadaama ay jirto dareen ah in hawshu gaabis ku jirto. Sidoo kale dhismaha waddada Ceerigaabo, gaar ahaan 23-ka culvert iyo 60-ka kiiloomitir ee la qorsheeyey, waxa loo baahan yahay in Wasaaradda Hawlaha Guud ama warbaahinta rasmiga ahi ay Golaha la wadaagaan halka ay marayso.

Arrimaha caafimaadka ee Degmada Dhahar, Durduqsi, Dhoqoshay, Agabar iyo Baki, gaar ahaan xaaladaha kaneecada, waxa loo baahan yahay in laga helo warbixin cad, isla markaana la ogaado halka ay marayaan tallaabooyinka wax looga qabanayo.

Arrinta iskuullada dalka, waxa la sheegay in ka badan 8,000 iskuul iyo in ka badan 4,000 macallin oo mutadawiciin ah ay ka shaqeeyaan. Qaar ka mid ah macallimiintaasi waxay shaqaynayeen ilaa 9 sano. Magacyadooda qaar waanu haynaa, inkastoo wakhtigu noo saamaxayn inaan halkaa ku wada sheego. Waxaan ku raacsanahay xildhibaannadii hore ee arrintan ka hadlay, waxaana aaMinsanahay in mutadawiciintu xaq ku leeyihiin qarankan. Waxa kale oo jira dhalinyaro tababar ku qaatay wasaaradaha, kuwaas oo noqonaya koox kale oo dhibban, waana muhiim in liiskooda laga helo wasaaradaha. Xaqiiqdii, xildhibaan kasta oo halkan fadhiya waxa uu ogyahay in dadkii uu metelayay ay ku dhibban yihiin arrimahan.

Arrimaha dibadda, inkastoo aanay canaan qaran ahayn, haddana waxa jira meelo liicitaan yar laga dareemayo oo u baahan in si feejigan loo eego.

To: The Security Council, the United Nations, the African Union (AU), the Arab League, and the Parliaments of all Nations. The international community, including the United Nations, the European Union, the African Union, and the Arab League, are aware of the talks between Somaliland and Somalia. These talks have been ongoing for several years in the presence of the international community, including meetings held in London, Istanbul, Dubai, and Djibouti.

Dear all international global communities and governments, The Republic of Somaliland has been debating the outcomes of the talks between Somaliland and Somalia, with due respect to the presence and facilitation of the international community throughout the years. However, the Republic of Somaliland has now reached a clear conclusion and decision, which we hereby openly communicate to the international global communities

and governments, the Security Council, the United Nations, the African Union, the Arab League, and the parliaments of all nations, as follows:

**Principles of Declaration** According to the Istanbul II Communiqué of 18 January 2014, the ad-hoc committee appointed by the two governments has been hijacked by the Government of the Republic of Somalia. In this regard, Somaliland does not recognize a federal government in Mogadishu that considers the sovereign Republic of Somaliland as an autonomous regional entity within the so-called Federal Republic of Somalia.

The Republic of Somaliland clearly declares to the global community that British Somaliland only entered into a voluntary union prior to 1991, and that any future talks can only resume between the two governments that formed the Republic of Somalia on 1 May 1960, namely the British Somaliland Protectorate and the Italian-colonized Somaliland (Somali Italiano).

Accordingly, we inform the international community that no development projects or programs shall be implemented in Somalia—except for humanitarian assistance—as long as the Somali Italian administration in Mogadishu continues to claim that the sovereign Republic of Somaliland is an entity of the Federal Republic of Somalia, a claim which we categorically reject, as we are not part of it and do not share any socio-political, economic, or governance framework with it at any level.

Somaliland and Somalia-Italians will never be the same state. The situation will remain in perpetual conflict unless Somalia fully accepts and recognizes the independence and sovereignty of the Republic of Somaliland.

**Md. Jaamac Axmed Oogle** **(09 MIN, 13Sec): –** Bismillaahi. Marka hore waxaan salaamayaa Shir-guddoonka iyo dhammaan Xubnaha Golaha, ASC dhammaantiin. Intaas ka dib, maaddaama uu yahay fadhigii dambe, waxaan u malaynayaa in hadallo badan hore loo soo jeediyey, aniguna wax yar ayaan ku dari doonaa, anigoo ku bilaabaya Goleheenna.

Goleheenna waxa aynu ku fadhinaa codkii shacabka. Waxa aynu nahay qaybtii dawladda ee dadku soo doorteen, isla markaana ay ka rajaynayaan ilaalinta danahooda. Waxa kale oo aynu nahay qalbigii dawladnimada Somaliland. Xadiith uu Rasuulku (CSW) ka sheegay jidhka insaanka ayaa tilmaamaya in haddii xubin gaar ahi xumaato ay xubnaha kale oo dhammi xumaanayaan, haddii ay hagaagtana ay dhammaantood hagaagayaan, xubintaas oo ah wadnaha. Sidaas awgeed, innagu waxa aynu nahay wadnihii Somaliland. Haddii aynu qaloocanno, wax hagaagayaa ma jiri doonaan, waayo waxa aynu nahay xeerkii, waxa aynu nahay kuwii loo daba-fadhiisanayey wixii dalka lagu xukumi lahaa. Waxa aynu nahay kuwii qaban lahaa xukuumadda haddii ay ka baydho waajibaadkeeda, una sheegi lahaa inay istaagto. Waxa kale oo aynu nahay kuwii, marka ay timaaddo arrin khilaaf ah oo la isku mari waayo, aan ka noqon daawadayaal, balse ka noqda gole guurti ah oo dhex-dhexaadin iyo isu-soo-dhaweyn sameeya.

Si kastaba ha ahaatee, waxa muuqata in wiiggan dambe hadallada Golaha ka baxaya ay u ekaadeen kuwo xisbiyadu mid walba ka hadlayo ra'yigiisa iyo dantiisa, taas oo aan waxba ku soo kordhinayn qaranimada, isla markaana hoos u dhigaysa haybaddii iyo sharaftii Golaha. Markii aynu halkan soo galnay, waxa nalagu aaMinay mas'uuliyad culus oo ah ilaalinta sharafta Golaha, dastuurka, iyo danaha qaranka, iyada oo caadifadana la liqayo. In xildhibaan waliba ku hadlo af xisbi, isla markaana doodaha mucaaradka iyo muxaafidkaba lagu kala jawaabo gudaha Golaha, anigu ceeb ayaan u arkaa.

Waxa kale oo jirta in Golahan loo doortay inuu u shaqeeyo ummadda, inuu ilaaliyo dastuurka, balse aan lagu iman raadinta muuqaal, "view" ama "share". Waxaa jira odayaal waayeel ah, sharaf leh, oo habeen iyo maalin ka hadla danta qaranka, aan gef iyo ceeb toona ku hadlin, balse aan baraha bulshada ka muuqan, sababtuna tahay inay facebook-yo lahayn. Kuwaas aamuskooda ku shaqeeya ayaa ka qiimo badan kuwa uun hadalka u adeegsada in lagu yidhaahdo "hebalkii baa shacabkii u hadlay". Sharafta iyo karaamadu waxay ku jirtaa shaqada aamusan ee danta qaranka ah.

Sidaas darteed, waxaan leeyahay aynu kala saarno wixii naloo soo doortay ee waajibka sharci ah iyo wixii sumcad raadis ah. Sharafta iyo cisiguna Ilaahay ayay ka yimaaddaan.

Arrinta kale, muranka jira waxa sal u ah dastuurka. Waxaa jira waxyaabo xukuumaddu iska indho-tirto, sidoo kalena waxyaabo mucaaradku ku tumo. Haddii aynu kala qaybsanno, isma soo dhawayn karno. Marka hore, waxa dastuurkeennu dhigaya in dalka lagu xukumo diinta Islaamka. Haddii aynu arrintaas ku adkaysanno, ma jirto cid ka hor imanaysa, waayo diinta Islaamku waa cadaalad, waa sinaan, waa ka hortagga musuqmaasuqa iyo dulmiga. Sidaas darteed, taladayda koowaad waa inaynu ku noqono ku dhaqanka diinta Islaamka.

Arrinta labaad, waxa aynu inta badan ka hadalnaa doorashooyin, iyada oo dalku wajahayo abaaro culus. Anigu waxaan ka imid Gobolka Sanaag. Roobku si siman ugama di'in; meelaha qaarkood roob yar baa da'ay, balse ma aha mid dadka ku filan. Dad badan baa u guuray meelahaas yar ee roobku helay, taas oo keentay ciriiri iyo baahi dheeraad ah. Haddii aanu Ilaahay raxmad kale shubin, masiibo ka weyn tii Suuqa Waaheen baa iman karta. Guddidii abaaruhuna roobkii yaraa ka dib wax war ah kama soo saarin, inkasta oo lacag la ururiyey.

Anigu waxaan ahay qof reer miyi ah, sidoo kalena beeralay ah. Dalaggii beertayda ka soo go'ay, gaar ahaan basal, wuxuu gaadhay heer aanu cid iibsanayso helin, sababtuna waxay ahayd in markabyo badan oo basal ah laga keenay Yemen iyo Itoobiya. Taasi waxay keentay in beeralaydu khasaaraan. Haddii aan beeralayda la dhiirrigelin, oo aan la xakamayn wax-soo-dejinta marka dalaggu bislaado, beeralaydu way joojinayaan shaqada, dalkunana wuxuu sii ahaan doonaa mid ku tiirsan wax dibadda laga keeno. Sidaas darteed, marka dalagga gudaha bislaado waa in la qiimeeyaa baahida dhabta ah, lana xaddidaa wax-soo-dejinta.

Ugu dambayn, arrinta cadaaladda. In badan ayaynu ka hadalnaa cadaalad-darro, annagoo eedaynayna maxkamadaha. Laakiin xaqiiqadu waxay tahay in cadaaladda innaga naloo doortay. Ilaa maanta waxa maxkamadaha lagu shaqeeyaa xeerar ciqaabeed oo gaboobay, isla kuwii lixdamaadkii lagu dhaqmi jiray. Yaa wax ka beddelay? Maxaynu ka qabanay? Dulmiga aynu ka cabanayno, isla xeerarkaas ayuu ka imanayaa.

Ilaahay ha u naxariistee, Xaaji Aadan Af-Qallooc wuxuu gabay tiriyey dhammaadkii 1968-kii ama bilowgii 1969-kii, kaas oo weli maanta quseeya. Bayd ka mid ah gabaygaas wuxuu yidhi: *"Markaad maxkamadaha tagto baad tacajabaysaa, Inkastoo xaq kaa maqan aad waddo iyo marag cad oo taagan, Ama aad xujada toosiso oo looyarku istiilo, Gartu hadalka kuma tami ee taagtu waa lacag."*

Maanta tii baa taagan, maxkamadahana inteenna badani waynu ognahay. Ninka lacag badan haysta ama meel kale ku xidhan keliya ayaa fursad hela. Arrintaas ayuu ka hadlay Abwaanku, isaga oo ka hadlaya wasiirrada xafiisyada inoo fadhiya, wuxuuna yidhi:

"Tallaabada mid gaalkii shabaha, tagay ma liibaane, Adigoo wuxuun tabanaya oo tagay halkuu joogo, Markuu sida libaax raqi u taallo qoorta kor u taago, Ee taiga luquntiisa sudhan taabto faraqiisa, Ee inaad adoonkiis tahay, taasna la ahaatay, Iyana waa tabaalaha wakhtiga aynu aragnaaye, Tu kaleeto oo ka daran baa jirtee, taasna bal aan sheego."

Gabaygaasi waa gabay dheer oo haddii la akhriyo aad mooddo inuu sawirayo xaaladda maanta taagan. Konton iyo saddex (53) sannadood ayaa ka soo wareegtay wakhtigii uu ka hadlayey, haddana weli waa taagan yahay. Intaas ayaan kaga baxayaa, rag badan baa igu xiga, aan fursadda siiyo. Aad baad u mahadsan tihiin. WSC.

**Md. Mustafe Axmed Cabdilaahi (Khayreeye)** (17 MIN, 20 Sec): – Bismillaahi. Mudanayaal, Shir-guddoonka sharafta leh, ASC. Bacda salaam, dhowrkii maalmood ee u dambeeyey waxa aynu ku jirnay doodda xaaladda guud ee dalka. Xildhibaan walba xaglo kala duwan ayuu ka galay, marka dhinac laga eegona dooddu waxay ahayd mid warbixin ah oo wax badan laga faa'iiday. Aniga hadalkaygu waa kooban yahay.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, marka laga hadlayo nabadgelyada guud ee qaranka, ma jirto wax dhibaato nabadgelyo-darro ah oo culus oo aan halkan ka soo sheegayo. Ilaahay idamkiina, nabadda shacabka Somaliland ku naaloonayaan waxa door weyn ka qaata dadweynaha laftooda, waxaana uga mahadnaqayaa guud ahaan bulshada.

Dhacdadii Ciidanka Booliiska ee shilka gaadhi ee Degmada Caynaba, waxa dhacday 11-kii bishii Juun, abbaaro lixdii subaxnimo. Laba askari oo ka tirsanaa Ciidanka Booliiska Jamhuuriyadda Somaliland ayaa halkaas ku geeriyooday shil gaadhi iyagoo ku jiray hawl-gal amni oo la xidhiidhay diyaargarowgii 18-ka May. Waxaan tacsi u dirayaa guud ahaan qaranka, askartaasina Ilaahay ha u naxariisto. Waxay ahaayeen askar qaran oo waajibkoodii gudanayay.

Si kastaba ha ahaatee, aad baan uga xumahay in maanta oo ay taariikhdu tahay 21-ka bisha ay wali askartaasi ku jiraan talaagada, iyada oo 10 maalmood ay ka soo wareegtay geeridooda. Qof mayd ah oo 10 maalmood talaagad ku jira xaaladdiisa waa la wada ogsoon yahay. Dhacdadaasi waxa ku dhintay laba askari, lix askarina way ku dhaawacmeen, gaadhigii ciidankuna wuu ku baaba'ay.

Warbixin aan dhamaystirnayn ayaa ka timi gobolka, taas oo noqotay caqabad ku keentay in kiiska si dhakhso ah loo xalliyo. Taliyaha Ciidanka Booliisku wuxuu u diray saddex sarkaal oo ku xeel dheer baadhista dhacdooyinka, kuwaas oo diyaariyey warbixin una gudbiyey maxkamadda. Si kastaba, kiisku halkaas ayuu ku xaniban yahay.

Xeerka Booliiska, Xeer Lr. 63/2017, Qodobkiisa 25aad, ayaa si cad u tilmaamaya waajibaadka laga qaadayo kiisaska noocaas ah. Haddana waajibkaasi lama fulin. Waxaa la sheegay in askarigii waday gaadhiga, oo isna dhaawac ah isla markaana xiran, lagu eedeeyey mas'uuliyadda kiiska.

Arrintani waa mid aad looga naxo, waana mid dhaawacaysa sumcadda nabadgelyada aynu ku faanno. Marka askari hawl-gal ku jiro waxyeelo soo gaadho, magta waxa bixisa dawladda. Sidaas ayay shuruucdu dhigayaan. In maanta askar qaran oo hawl-gal ku jiray maydkoodii 10 cisho talaagad ku jiro waa ceeb qaran, waa ceeb dawladnimo, waana ceeb ku dhacday Ciidanka Booliiska.

Arrintani dhiirrigelin uma noqonayso askarta kale ee hawl-galada gala. Marka ay arkaan in askarigii ka horreeyey aan la aasin, cidina aanay u istaagin, niyad jab bay keentaa. Sidaas awgeed, waxaan Madaxweynaha ka codsanaynaa in uu si toos ah u farageliyo, maaddaama masuuliyiintii hoose ay ku guul-darreysteen xallinta arrintan.

Arrinta Magaalada Oog, duufaan roob ayaa ka dhacday, in ka badan 60 guri ayaana waxyeelo soo gaadhay. Intii aanay gaadhin guryaha shacabka, waxa burburay xarumihii adeegga bulshada sida cusbitaalka, MCH-yada, Dawladda Hoose iyo iskuulladii. Inkasta oo wafti uu hoggaaMinayey Wasiirka Diinta iyo Aw-Qaaftu uu booqday, haddana wax fal-celin ah oo la taaban karo wali ma jirto. Waxaan soo jeedinaynaa in arrintaas si deg-deg ah wax looga qabto, dadka danyarta ahna la caawiyo.

Arrimaha doorashooyinka, dood badan ayaa laga yeeshay. Waxaan ka xumahay in annagoo xildhibaano ah aynaan hore uga hadlin sidii looga hortagi lahaa caqabadaha doorashooyinka. Laba doorasho ayaa dalka horyaalla. Doorashada Madaxtooyadu waxay ku eegan tahay 13-ka November, maaddaama muddada Madaxweynaha ay ku egtahay 13-ka December.

Dastuurku, gaar ahaan Qodobka 9aad, wuxuu dhigaya nidaam siyaasadeed oo ku dhisan tallo-wadaag. Sidaas awgeed, waa in arrimaha doorashooyinka lagu wajahaa tallo qaran, lagana fogaadaa kala qaybsanaan. Haddii aan la wada qaban karin labada doorasho, waa in si cad loo isla gartaa midda la qabanayo iyo midda la kordhinayo, iyadoo la ilaalinayo dastuurka iyo sharciga.

Waxaan arkay xildhibaano ku doodaya oo leh: *"tan ururradu waa xeer, tan Madaxtooyaduna waa dastuuri"*. Arrintaasi waa **been**, ummadana in la marin-habaabiyo oo xog khaldan loo sheego maaha wax la aqbali karo. Nidaamka doorashooyinka ururrada/xisbiyadu waa **nidaam dastuuri ah**. Qodobka 9aad, Farqaddiisa 3aad, ayaa si cad u tilmaamaya in tartanka ururradu ku salaysan yahay dastuur, isla markaana uu xeer jideynayo. Xeerkaasina waa **Xeer Lr. 14**. Sidoo kale, **Xeer Lr. 91**, oo ah xeerka doorashooyinka, waa la akhriyaa, waana xeer qeexaya nidaamka doorashooyinka dalka.

Sidaas awgeed, ummadda yaan laga dhaadhicin in ay jiraan doorashooyin aan dastuuri ahayn. **Ma jirto doorasho ka dhacda Somaliland oo aan dastuuri ahayn**, dhammaan doorashooyinka dalku waa kuwo dastuuri ah.

Arrintaas awgeed, waxaan masuuliyiinta qaranka iyo asxaabta qaranka u soo jeedinayaa in **yooyootanka la joojiyo**. Masuuliyadda inaga saaran waa xeer-dejinta; wixii inaga saaran aynu dhamayno, oo qofka hoosta uga xidhanno. Wixii u baahan in si guud looga heshiiyo, daneeyayaashu way ka qayb-qaadan karaan, balse **daneeyayaashu xeer-dejiyeyaal maaha**. Xeerarka annaga ayaa dejinayna.

Waxaan soo jeedinayaa in muwaadiniinta doonaya inay xisbiyo furtaan la qanciyo, qarankuna go'aan cad ka gaadho haddii maanta doorashada dib loo dhigayo oo tan Madaxtooyada la qabanayo. Hase yeeshee, **in si gaar ah loo daneeyo cid, lana lumiyo xuquuqda muwaadiniinta kale, xaq uma arko**. Sida aan xaq ugu leeyahay in 13-ka December Madaxweyne la doorto ama dib loo doorto, ayaan sidoo kale u leeyahay oo aan u taaganahay in muwaadiniinta iyo xisbiyada qaranku ay helaan xaqooda tartan. Nidaamka ururrada/xisbiyadu **ma aha nidaam xeer oo keliya, waa nidaam dastuuri ah**, sidaas darteed arrimahaas yaan caadifad lagu gelin.

Mudane Guddoomiye, xeerar badan ayaa Golaha inoo yimaada, hase yeeshee **qaabka aynu u maamulno xeerarkaasi aad buu u liitaa**. Marka xeer inoo yimaado, inta badan waxa aynu eegnaa qodobbada sharciga, balse waxa ka horreeya xeerka **siyaasad**. Hay'adda dawladdeed ee keenaysa xeer, sida Xeerka Caymiska tusaale ahaan, waa inay marka hore inoo soo bandhigtaa **siyaasadda caymiska qaranka**, baahida loo qabo, iyo ujeeddada ka dambaysa keenista xeerkaas.

Sidoo kale, haddii la keenayo Xeerka Aafooyinka Dabiiciga ah, waa in la inoo soo bandhigaa duruufaha iyo dhacdooyinka sababay in xeerkaasi yimaaddo. In hay'ad walba maalin walba keento qodobo sharci ah oo ay tidhaahdo "xeer baanu rabnaa", iyadoo aan la caddeyn siyaasaddii ka horreysay, waa **xalaalaysi lagu xalaalaysanayo nidaam aan sharci ahayn**, waana ceeb Golaha ku ah dhinaca isla-xisaabtanka iyo xil-gudashada.

Hay'adaha dawladda iyo xildhibaanadaba – xildhibaanada xaqa u leh inay keeni karaan mashruuc sharci (11 xildhibaan) – waa inay **ka horaysiiyaan siyaasadda guud ee mashruuca sharci**, ujeeddadiisa, iyo sababaha keenay, ka hor inta aan mashruuca la keenin. Arrintaas dhinaceeda, aad baynu uga liidanaa, waxaana loo baahan yahay in la saxo si isla-

xisaabtanku u muuqdo. Mudane Guddoomiye, adigoo mahadsan, waxaan rajaynayaa in arrintaasi mustaqbalka muuqato oo la hagaajiyo.

Ugu dambayn, waxaan rajaynayaa in masuuliyiinta qaranka ee Golaha xaqa iyo waajibaadka dastuuriga ah u siinayo inuu la xisaabtamo, si dhab ah loola xisaabtamo. Ilaa iyo inta aynu sidan nahay, **masuuliyiin badan oo waajibaadkoodii dastuuriga ahaa ka baaqsaday ayaanu u yeedhnay**, hase yeeshee wax tallaabo ah lagama qaadin. Fasax ayaa la galay, wax go'aan ahna lama qaadin.

Taasi waxay muujinaysaa in **gudiyada Golaha iyo shaqooyinkoodii la curyaamiyey**, gaar ahaan dhinaca Shir-guddoonka. Shir-guddoonku waa hogaamiyaha Golaha; marka masuul loo yeedho, oo marar badan u iman waayo, si kas ahna u baal-mariyo waajibkiisa, taasi waa **sharci-jab**. Haddii Shir-guddoonku tallaabo ka qaadi waayo, mas'uuliyaddaas waxa qaadaya Shir-guddoonka laftiisa.

Sidaas darteed, Shir-guddoonka waxaan ku boorinayaa inay **qaataan doorkooda hoggaaMineed**, una ixtiraamaan shaqada gudiyada, isla markaana ka qaadaan masuuliyiinta waajibaadka dastuuriga ah ee saaran.

**Cawad Cali Maxamed** — **C/risaaq Siciid Ayaanle**

**Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** — **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

-------------------------------------------------- --------------------------------------